Good Local Governance and Leadership Training Programme (GLTP)

Hab-xukunka Degaan ee Habboon iyo Barnaamijka Tababarka Hoggaamineed

# DHISMAHA TAMARTA

## URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA EE DHINACA MAAMULIDDA IYO HARUMARINTA KARTIDA AADMIGA

## QAYBTA 2

NAQSHAD DEJINTA TULLKA EE MAAMULULKA IYO TABABARKA

UN-HABITAT

European Commission

BUILDING NGO/CBO CAPACITY THROUGH DEVELOPING AND MANAGING HUMAN RESOURCES

Part II Management and Training Design Tools

# TAMARTA
# URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA EE DHINACA MAAMULIDDA IYO HARUMARINTA KARTIDA AADMIGA

## QAYBTA 2
## NAQSHAD DEJINTA TUULKA EE MAAMULKA IYO TABABARKA

Waxa unkay FRED FISHER
Isagoo la kaashaday khabiirada hoos ku qoran ee ka socda:

- David Tees, Jaamacadda Texas ee Arlington ku taalla
- Shariikyada Romania Foundation ee Harumarinta Dawladda Hoose (FPDL)
- UN-HABITAT, Barnaamijka Degsiimooyinka Aadmiga ee Qaramada Midoobay
- Hay' adaha Tababarka, NGO iyo CBO-yada ku yaalla Lama Degaan-ka –Roonta Africa
- Hay'adaha Tababarka Dalalka CEE/SEE.

# WUXUU KA KOOBAN YAHAY

| | |
|---|---|
| GOGOL DHIGID | 4 |
| AQOONSI | 6 |
| HORDHAC | 7 |
| TUULKA 1: Bandhigsamayn | 11 |
| TUULKA 2:Qiimaynta ahmiyadda iyo hawlkarnimada MKA | 13 |
| TUULKA 3:Khariidad u jeexidda xuduudda MKA | 21 |
| TUULKA 4: Garashada doorka siyaasadaha ee maamulidda kartida aadmiga | 23 |
| TUULKA 5:Qoritaanka ogaysiisyada shaqo | 25 |
| TUULKA 6: Qodobka u bedidda | 27 |
| TUULKA 7: Hawsha shaqo qoridda iyo kiraysiga | 31 |
| TUULKA 8: Shaqaalaynta xoog –ku deeqayaasha | 35 |
| TUULKA 9: Maamulidda waxqabadka shaqaalaha iyo xoog-ku deeqayaasha | 39 |
| TUULKA 9 B: Istaraatiijiyadaha Qoraayadu ay doorbideen | 47 |
| TUULKA 10: Harumarinta kartida aadmiga mutadawaciinta | 49 |
| TUULKA 11: Qiimaynta waxqabadka shaqaalaha | 51 |
| TUULKA 12: Shaqo jeclaysiinta shaqaalaha | 57 |
| TUULKA 13: Maaraynta waxqabadka aan laga raalli ahayn | 61 |
| TUUKA 14: Diyaarinta qorshe waxqabad | 65 |
| TUULKA 15: Qorista buugga warsiinta shaqaalaha | 67 |
| ERAY BIXIN | 75 |

## GOGOL-DHIGID

Taxanahan la xidhiidha buugagga hagayaasha ah, Dhismaha Tamarta NGO/CBO-yada loogu talo galay kobcinta maamulka guud iyo firfircoonida hawleed ee hay'adaha aan dawladda ahayn iyo kuwa salka ku haya bulshada, waxay waafaqsan yihiin kor u dhigidda Xarunta Qaramada Midoobay ee Degsiimooyinka Aadamaha (UNCHS) si ay ugu sugnaato barnaamij dhammaystiran oo ay leedahay Qaramada Midoobay laanteeda Degsimooyinka Aadamaha, si uu ugu tilmaamo/ magacaabo UN-HABITAT Shirweynaha Guud ee Qaramada Midoobay Kal fadhigiisii 56aad ee la isugu yimid December 2001. Isbeddelkaas hay'adeed daraadeed, UN HABITAT xaaladeedu way ka roonaanaysaa siday ahayd waa, taasoo ay ka gargaari karto dawladaha iyo shuraakahaba inay fuliyaan Ajandihii UN-HABITAT ee lagu qaatay 1996 Shirweynihii Istanbul ee Turkey laguna ansixiyey mar labaad golihii Loo Dhammaa ee Jimciyadda Quruumaha ka dhaxaysa Kulankeedii Gaar Ahaaneed Istanbul+5 ee June 2001. NGO iyo CBO-yadu waxay leeyihiin door gaar ahaaneed oo muhiim ah oo ay ka ciyaaraan helidda /gaadhidda ujeeddada weyn ee laga leeyahay ajandaha UN-HABITAT, kasoo dhamman u noqonaya jawi nololeed oo kii hore ka wacan. Ku dhaqaaqidda taxanaha waxay isla waqti dhaceen/ isku soo beegmeen abuuriddii (unkiddii) Laanta Tababrka iyo Dhismaha Awoodda ee 'UN-HABITAT' taasoo ifinaysa aqoonsigayaga cusub ee ahamiyadda dhismaha awooddu inuu yahay tuul hawleed oo lagama maarmaan ah oo lagu gaadhi karo bartil-maameed harumar cad u noqon kara nolosha ugu yaraan dad baahan oo gaadhaya 100 malyuun oo ku nool meelaha carshaanta / isku raranta ah ee magaalooyinka sannadka 2020, sida lagu cad-deeyey Millennium Declatarion-ka (Warbixinta Kunka Sannadood).

Waxa jira daliil isa soo taraya iyo aqoonsi soo kordhaaya oo ku lug leh qiimayowga dhowrka ah ee sharaxa xadeeyana ajandaha reer magaalku sida uu noqon doono 1000 sano ee soo socda. Ka-wada-qayb-galka / cidna-lama-dhaafaanta ayaa ka mid ah. Bulshooyinka raba inay ahaadaan kuwa safafka hore ka gala dhinacyada isbeddelada bulsho iyo dhaqaale waa inay qiraan ahamiyadda ay leedahay inaan cidna laga tegin/la tixgaliyo iyadoo aan loo eegayn maalqabeenimo, lab/dhedig, da', qolo/ummad, diin marka lagu gudajiro hirgelinta go'aamada wax ku kordhin kara tayada noloshooda.

Aqoonsiga labaad wuxu ka kooban yahay hoggaamin la qaybsado oo ay u wada dhan yihiin waaxaha hay'adaha iyo bulshaduba. Taas micnaheedu waxa weeye in loo arko hay'adaha aan duwaliga ahayn iyo kuwa salka ku haya bulshada qaar hawlkar ah iyo shuraako qiima leh marka la qaybsanayo hoggaaminta iyo mas'uuliyadaha. Buugagga hagayaasha ah ee loo yaqaan "Building Bridges" ee ay usoo daabacday UN-HABITAT
si ay u noqdaan taxanayaal dheeraad ah oo kuwa kale ladhaya waxa loola jeedaa inay wax ka qabtaan / wax u taraan maamulka mashaariicda wada-qorshaynta leh iyo weliba maamulka la iskaga hor yimaaddo la iskuna afgaran waayo ee ku fida dadweynaha/dawladda iyo hay'adaha aan faa'iidada ku dhisnayn ee bulshada.

Gunaanadka aqoonsigu wuxuu yahay baahida loo qabo hawlkarnimada hay'adeed ee NGO-CBO-yada bulshada dhexdeeda ah- isku keenidda /kulminta aqoonta, xirfadaha, khibradda, iyo nidargelidda, taasoo xoojin karta maaraynta tamartooda maaliyadeed iyo
aadminimo iyo helitaanka dadaal xad dhaaf ah oo ay si karti leh wax ugu qabsadaan. Si ay u ahaadaan shuraake adag oo karti leh, NGO-CBO-yadu waa inay muujin/badhigi karaan in gurya-hooduna ay nidaamsan yihiin.

Sida lagu tilmaamay taxanahan, tuulka barashada dhammaystirku wuxu ahaa mashruuc ay iska kaashadeen UN-HABITAT iyo Partners Romania Foundation for Local Development, taasoo maalgelinta inteeda badan laga helay Open Society Institute (Machadka Bulshada Furan) iyo dawladda Netherlands/Holland. Intaas waxa dheer, qaar kale oo badan ayaa ku lug lahaa harudhigidda taxanahan, kuwaasoo ay ku jireen:-

1. Koox nidargashan oo ah Hay'ado aan Duwali ahayn, Hay'ado Salka Ku Haya Bulshada iyo hoggaamiyayaasha dawladda hoose ee ka socday lama degaan-ka roonta Africa, kuwaasoo isugu yimid inay tilmaamaan baahiyahooda barasho markuu u socday aqoon –isweydaarigii UN-HABITAT ee Istaatiijiyadaha Dhismaha Tamarta ee lagu qabtay Nakuru, Kenya November 1998, kuwaasoo qayb firfircoon ka qaatay dib-u-dhugashada qabyada-qoraal laguna ogolaaday in lagu qabto aqoon-is weydaarsi sixid/talabixin ah Nyeri, Kenya, 2001; iyo

2. Shabakad hay'ado iyo tababarayaal isugu jira oo ka wakiil ah Barnaamijka Goboleed ee Dhismaha Tamarta Xagga Dawladda iyo Hoggaaminta Daakhiliga Ah ee Dalalka Europeta Bari iyo Dhexe ee ka qayb qaatay tijaabada goobta shaqo ee ku saabsan qabyo qoraaladii hore ee murtiyaha .

Ugu dambayntii, waxaan rabaa inaan mahadnaq gaadhsiiyo Fred Fisher, qoraaga buuggan iyo mu'allifka sare ee taxanahan iyo kooxda tayada sare ee iskaashiga leh ee uu isugu keenay in si farshaxanimo /xirfad ah u dhigaan murtiyahan. Kooxda xirfadlayaasha sare ee UN-HABITAT, ee uu madaxada ka ahaa Tomasz Sudra waxay la yimaaddeen waaya-aragnimo badan iyo xirfado gebagebayntii qabyada qoraalada iyo soo saarka kale, iyo weliba kooxda Partners Romania Foundaton for Local Development, ee ay hormoodka ka ahayd Ana Vasilache oo u xilsaarnaa hidndisaha meelaynta/nashqad-dejinta qaababka iyo hawlaha waxbaridda/waxdhigidda ee soo bandhigiddii ugu dambaysay ee buugaggan.

**Anna Kajumulo Tibaijuka**
**Under Secretary General**
**and Executive Director**
**(UN-HABITAT)**

## AQOONSI

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee “dhismaha tamarta ururrada aan xukuumiga ahayn iyo kuwa bulshada ee dhinaca maamulidda iyo harumarinta kartida aadmiga” waxay ku hirgashay Barnaamajka Is-maamulka Fiican iyo Tababarka Hoggaanka la soo doortay ee ay maal-gelisay Komishanka Yurub (EU), isla markaana uu fuliyay Xafiis Goboleedka UN-HABITAT ee Afrika iyo Dalalka Carbeed.

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee buugan, waxa ka hawl-galay Mr.Yassin Axmad Guuleed oo tarjumadda iyo tifaf-tirka ku xeel dheer; isaga oo ay ka caawiyay barnaamijka Qaramada Midoobay ee Degsiimaha Aadamaha (UN-HABITAT), laanteeda Hargeysa ku taal.

Waxa kale oo mahad-naq mudan Jacfar Maxamed Gaaddaweyne oo Akaademiga Nabadda iyo Horumarka ee Somaliland ka tirsan, Maxamed Muumin oo Jaamicadda Bariga Afrika ee Puntland ka tirsan iyo Maxamed Afrax oo Xarunta Cilmi-baadhista iyo Dood-wadaagga ee Koonfurta-Dhexe ee Soomaaliya ka tirsan, kuwaas oo wada diyaariyay tarjumadda ereyada Ingiriisiga ah ee Tilmaame-barayaashan ku jira.

*This manual is part of a series that was published by the UN-HABITAT Training and Capacity Building Branch (TCBB) for ‘capacity building of NGOs and CBOs’ and ‘Building Bridges between local governments and citizens’. As part of the ‘Good Local Governance and Leadership Training Programme (GLTP)’, these manuals were translated into Somali and adapted to the Somali context. The GLTP was funded by the European Commission and implemented by UN-HABITAT under the Regional Office for Africa and Arab States (ROAAS) between July 2003 and June 2005. More information on this project can be found at www.unhabitat.org/roaas.*

# HORDHAC

Tuulalka soo socda waxa loogu talagalay in looga helo fikrado laba nooc oo daawadayaal ah.

- Qofaf doonaya inay ku dhaqaaqaan noocyo dhowr ah oo waya-aragnimo tababar leh si ay uga caawiyaan dad kale maamulidda iyo harumarinta kartida aadmiga ee bulshada ka qaybgalayaasha NGO/CBO-yada dhexdooda; iyo.
- Maamulayaasha iyo kormeerayaasha NGO-CBO-yada raba inay hore u dhigaan qaababka iyo dhaqamada MKA ee hay'adooda.

Dabcan, kooxdan labaad waxay tahay hadafka kowaad ee labada xaaladoodba, sidaas awgeedna erayo yar oo soo dhoweyn iyo dhiirrigelin u noqda maamulayaasha NGO-CBO-yada akhrisan doona buuggan faritaanka ah. Waxa laga yaabaa inaad doonto inaad ka shaqayso layliyaasha qaar kaligaa si aad kor ugu qaaddo aqoontaada iyo xirfadaha meelo/goobo aad danaynayso kuna werwersan tahay. Ama waxaa baad u dhowdahay inaad rabto isticmaalka carbisyada qaarkood sidii oo ay qayb ka yihiin dhacdo harumar oo koox maamul khusaysa si ay diirrimaad u geliso iyo dardar sida aad iminka u maamusho kartida aadamaha hay'addiina gudaheeda.

Tusaale ahaan, Tuulka 2, Weydiimaha Qiimaynta ee la xidhiidha Ahamiyadda Firfircooni ee MKA, wuxu noqon karaa mid hawlkar ah marka la qabanayo dib u dhugasho koox maamul ee qaababkaaga iyo dhaqamadaada hadda aad ku tallaabsato. Tuulka 15, Hagitaanada La Xidhiidha Qoritaanka Buugga Faritaanka, wuxu kugu kicin karaa idiina hagi karaa adiga iyo kooxdaada maamul unkidda / allifaadda buug faritaan oo cusub amase dib u jalleecidda ama taariiikh soogaadhsiinta ka hadda La Isticmaalo.

**HORDHAC**

Iminka, waxa yar oo faallooyin ah oo ay leeyihiin goobjoogayaasha kor ku xusan-kuwa ku hawlan tababarka iyo harumarinta maamulayaasha NGO/CBO-yada iyo hay'adahooda. Labada tuul maamul ee iminka laga hadlayay waxa kale oo loo isticmaali karaa aqoon- isweydaarsiyada loo qabto hoggaamiyayaasha iyo shaqaalaha NGO-CBO-yada.Fikradaha qaar ku lug leh sida loogu isticmaalo jawiga tababar ayaa lagu soo daray si aad fiiro ugu yeelato.

Inkastoo layliyaasha kale ee qaybtan buugga ay marka hore ku jahaysan yihiin tabararayaasha, haddana maamulayaasha wax abuuri karaa waxa laga yaabaa inay u arkaan wax faa'iido leh, iyana. Wax kastaba doorkaagu ha noqdo amase danta aad ka leedahayba markaad isticmaalayso murtidan; waxa kale oo aanu kugu dhiirinaynaa

Inaad ka warkeento (explore) tuulka tababarka iyo xikmadaha ku jira buugagga farayaasha ah ee kale ee taxanayaashan. Kuwa aanu gaar ahaan kugula talinayno inaad ka bogatid waxa ku jira: "Kaabado Dhiska Xagga Qorshaha Laga Wada Qayb galo (Building Bridges Through Participatory Planning)" oo loogu talagalay fikradaha ku saabasan dhammaan dhinacyada go'aan samaynta; carbisyo door ah oo lga helo "Kaabado Dhiska Loo Sii Maro Iska horimaadka Maamul iyo Ismaagista" gaar ahaan, Tuulalka 1-5; iyo buugga la yidhaa "Hay'ado, Gacan u Gelinta Dadka, kaa soo loo qorsheeyay fikradaha ku lug leh dhismaha gaashaan buuraha/saaxiibada iyo shebekado ay hoos isaga daloolaan si ay u noqdaan istraatijiyado harumarinta kartida aadmiga oo firfircoon.

Iyadoo waxoogay isbeddelo ah lagu samaynayo, qaar badan oo tuulalkan ah ayaa noqon kara dar waxtar leh marka lagu jiro qorshaha barashada dhacdooyinku ay la socdaan.

Ha ka maagin inaad ahaato unke markaad adeegsanayso tuulalkan. Haddii ay noqoto masilaad door/kaalin, waxaad dib u qori kartaa doorarka aad ugu dhow/ugu eg xaaladaada. . Haddii ay tahay qaab qorshe wax qabad, hannaan u yeel (mold) si ay u waafaqdo baahiyaha cayiman ee ka qaybgalayaashaada. Haddii faritaanadu ay noqdaan qaar aad u murugsan, taasoo ah goljilayc ay caado aan laga jari karayn u leeyhihiin dadka qora buugaggan, waa inaad ka dhigtaan qaar sahlan ama aad qorshe dambe ugu noqotaan si ay idinka iyo daawadayaashiinaba idiinku shaqeeyaan.

## AALADDA NAQSHADAYNTA / SAWIRKA TUULKA

Bal aanu idinka siino fikrad ama laba naqshadda ama aaladda sawirka (format or template) ee aanu u adeegsanay farsamaynta tuulalkan.Waxaanu ka soo qaadaynaa in intooda badan dadka isticmaali doona aaladda naqshadaynta ay waaya-aragnimo u leeyihiin tabaabrayaal ahaan. Sidaas daraadeedna, faritaanadu ay ka faahfaahin yar yihiin sida ay dhigayaan buugagga la jaadka ah. Ulajeeddooyinka tababar waxa lagu beddelay (dubbed)/loo bixiyey ulajeeddooyin barasho, taasoo caddaan ah inay yihiin erayo xulasho. Intaas waxa dheer, waxa laga yaabaa in loo qoray si waxyar ka duwan sidii lagu baray inaad u qorto “ula jeeddooyin” ama sida run ahaan aad u qorto markaad naqshad u dejinayso dhacdo tababar.

Anaga aragtidayada fog, waxaanu kugu dedejinaynaa inaad qorto caddaymo ujeeddo leh si allaale sida idiin shaqo wacnaata adiga iyo ka qayb galayaashaada. Hawlgalka aanu isticmaalnaa wuxuu ku tiirsan yahay waxay nalatahay inuu yahay caqligal in lagu dhaqaaqo marka lagu jiro xisad tababar, marka erayo kale lagu sheego in la kordhiyo aqoonta, in kor loo qaado xirfadaha, inla beddelo meeshii laga taagnaa kolkii hore,ama in lala yimaaddo tallaabo nooc kale ah, tusaale, waxa ka soo baxa qorshe waxqabad si loo gaadho hadaf ama ujeeddo. Waqtiyada la qabtaa ee loo baahan yahay waa wax qiyaasta ugu dhow ah (guess-timates). Wax ka beddel hadba sida waafaqda baahiyahaaga tababar iyo ujeeddooyinka. Qodobada qaabku waxay tafaasiil ka bixinayaan sida aad u isticmaali karto tuulka ee aad u beegsan karto ujeeddadaada barasho.

Markaanu ka hadalno “qaab”. waxaanu ku soo darnay jaangoyn kooban oo tuulka 1 ku jirta, taasoo aanu soo bandhignay. Waa mid ka mida tuulka danaha badan fuliya ee loo qorsheeyey in lagu gaadho laba ujeeddo. Waa ta horee, waxaanu rabnaa inaanu kuu akidno inay qumman tahay in laga bixiyo cashar (Lecture) kol haddii ay kooban tahay iskuna xidhan tahay (interactive).

**TALABIXIN SOCDAAL**

Waxaanu doorbidnaa inaanu ugu yeedhno wadahadalada hagan! Ta labaad, waxaanu isleenahay waxay ka sii hawlkarsan yihiin marka loo qorsheeyo sidii dhacdooyin barasho oo ku biiriya fikrado cusub, warbixin, amase war ay tixgeliyaan ka soo qaybgalayaahu. Erayga furaha ah wuxu yahay “planned”, tuulka 1 waxa loogu talagalay in laga helo waxoogay hagitaan ah markaad qorshaynayso wixii aad soo bandhigi lahayd.

Fikradda kale ee u baahan in maskaxda lagu hayo marka lagu dhaadhacayo/la baadhayo sanduuqa tuulka. Nidaamka loo soo kala bandhigayo oo aan ahayn sida aad usoo kala hormarinayso istic-

maalkooda markaad hindisayso Dugsiga Aqoon-iswaydaarsi. Tusaale ahaan, tuullalka 2 iyo 15 ee hore loo soo sheegay waxa bilow ahaan loogu talagalay tuulalka maamul marxaladda labaadna waxa loo qoondeeyey inay noqdaan qalab lagu isticmaalo Dugsiga Aqoon-iswaydaarsiga. Dadkiina qorshaysanaya inay u isticmaalaan jaangoynta aqoon-isweydaarsi, waxaanu u soo hormarinay mid kasta oo ka mid ah fikrado la xidhiidha naqshad-dejinta tababar.

Sidii aanu ku soo sheegnay bilowga buuggan faraha ah, waxaanu jecelnahay inaad ka soo qaaddaan isku hawlkiina murtidan idinkoo ku jira “socdaal dhulraadineed” (a voyage of discovery). Iyadoo arrimo kalena ay jiraan, tan micnaheedu wuxuu yahay ka bixitaan ah jidka weyn ee ay jeexaan tuulalkani si loo helo wadiiqooyin yaryar oo muhiim u ah codbixiyayaashaada (constituents) tababar. Xilliyada qaar waxaad u dhowdahay inaad doontid in aad u isticmaashid tuulka si aad u jeexdid/ dhistid jid aad adigu leedahay. Si kastaba qorshahaagu ha ahaado ku lug leh qalabkan, waxaanu rajaynaynaa adiga iyo jalayaashaadu inaad ku raaxaysan doontaan socdaalkiina dhulraadineed.

Kani waa qoraal kooban oo xoojin ah khuseeyana sida loo isticmaalo tuulalkan, iyo faallooyin yar oo laga bixiyey siday isu xig-xigaan buuggan. Tuulka I waxa loo qorsheeyey inuu ahaado aalad-naqilaad oo fudud si loogu isticmaali karo meel kasta oo aqoon- isweydaarsi lagu qabanayo ama dhacdo barabsho oo dhisan si la isugu rakibo / la isu gelgeliyo looguna sameeyo bandhig kooban. Waa tuulakaas mid ka mid ah oo aanad agtaada ka fogaynayn had iyo goor, waayo, waa intaasoo aad u baahato. Tuulalka kale ee ah nooca la wadaagi karo (Generic Type) ee tababarka sida baraf-jebiyayaasha iyo dhalo-furayaasha, waxaad ka eegtaa buugagga kale ee taxanayaashan ka tirsan iyo weliba taxanaha UN-HABITAT ee Tababarka iyo Harumarinta.

Tuulka 2, sidii horeba loogu tilmaamay, waa weydiimo meelo bannaan oo la buuxinayo leh (questionnaire) oo loogu talagaly inay ka caawiyaan maamulayaasha ama kooxaha maamulka inay dhugasho qoto fog u yeeshaan siyaasadaha iyo dhaqamada MKA/HRA ee waqtigan xaadirka ah ee hay’addooda. Mar haddii uu yahay mid faahfaahsan, laga yaabee inaanu wax faa’iido ah u kordhin NGO-CBO-yada yaryar sida ay ugu faa’iido yeeshaan tuulalka kale qaarkood. Markay xaaladuhu sidaas noqdaan, waxaanu kugula talinaynaa inaanad iska dhaafin tuulkan gebi ahaantii, hayeeshee, aad dib u eegtid fikradaha dartood, kuwa khuseeya waxyaalaha aad qaban karto si aad u xoojiso isdiritaanada MKA ee hadda taagan ee ha’yaddiina. Waxa kale oo uu yahay soo ururin wacan oo caqli gal ah oo ku saabsan waxay MKA/HKA runtii yihiin si ay tababarayaashu ugu arkaan wax faa’iido leh oo ay markooda ugu dhaqmi karaan aqoon isweydaarsiyada.

Tuulka 15 ee ugu dambeeya, kuna saabsan Qoritaanka Buugga Hagaha Ah ee Shaqaalaha, wuxu inta badan yahay tuul maamule. Waxa looga dhigay dhammaadka/ nahaayadda Qaybta 2, mar haddii dhammaan carbisyada ka horreeyaa ay isbaddel ku kordhin karaan buugga iyagoo salka ku haya khibrado barasho oo door ah, kuwaasoo ay ka helaan maamulayaasha NGO/CBO-yada goor walba.

Adigoo faafaahintan ama murtidan haysta, waxa la gaadhay xilligii aad soo qabsan lahayd kolayga tuulka ee aad hawsha ku dhaqaaqi lahayd.

# TUULKA 1

## QAABKA LAGU TALABIXIYEY MARKA BANDHIGGA LA SAMAYNAYO

Xaalad kasta oo barasho, waxa jira waqti uu habboon yahay lama huraana yahay in la soo bandhigo aragtiyo cusub, fikrado, warbixino, war amase qalab. Waxaanu soo jeedinaynaa inaad fiiro u yeelato inaad ka dhigto arrinkan wadahadal laba geesood ah ama wada xaajoood hagan. Si lagaaga caawiyo dhismaha bandhigaaga amase wada hadalka hagan, intaanad ku dhaqaaqin, waxaad tixgelisaa inaad isticmaasho jaan goynta hoos ku muujisan. Tusaale ahaan, waxaad isticmaali kartaa qaabka la xidhiidha Tuulka 15 si aad u dhisto fikradaada khusaysa waxay ahmiyad ugu leedahay NGO iyo CBO-yada in la harumariyo buugga hagaha ah ee shaqaalaha ee loogu talagalo xoogku deeqayaasha ama  in la ifiyo/tilmaamo farqiyada u dhexeeya Maamulidda Kartida Aadmiga (MKA) iyo Harumarinta Kartida Aadmiga (HKA).

**TUULKA 1:
QAABKA LAGU
TALABIXIYAY
IN BANDHIGA
LAGU SAMEEYO**

**Magaca bandhigayga:**

________________________________________
________________________________________
________________________________________
________________________________________

**Qodabada muhiimka ah ee aan rabo inaan gaadho:
Saddex ama afar ayaa laga yaabaa inay ku filan yihiin haddii aad doonayso ka qayb galayaashu inay xasuustaan.**

________________________________________
________________________________________
________________________________________
________________________________________

**Tusaalooyinka nolosha runta ah ee aan isticmaali doono si aan qodobadayda u meel mariyo:**

________________________________________
________________________________________
________________________________________
________________________________________

**Su'aalaha aan ugu talagalay daawadayaashayada/goobjoogayaashayada:**
**Kuwas waxa loogu talagalayaa inay dhaliyaan faalo ku salaysan waaya-aragnimadooda la xidhiidha qodabada aad uga jeedo.**

____________________________________________________________
____________________________________________________________
____________________________________________________________
____________________________________________________________

**Soo-ururin ah qodobadayada muhiimka ah anigoo ugu soo celinaya wixii aan hore ugu sheegay si aanay u illaabin:**

____________________________________________________________
____________________________________________________________
____________________________________________________________
____________________________________________________________

**Qorshaha arag-tageerayaashayada (visual aids plan) aan ku xoojinayno fikrada hayaga kuna dhiirigelinayno ku jiritaankooda:**

____________________________________________________________
____________________________________________________________
____________________________________________________________
____________________________________________________________

**TALO-BIXIN SOCDAAL**

Jidwalkayaga qabashada wadahadalka hagan waa sida soo socota:______________ ________________________________________Isku darka waqtiga loo qorsheeyey bandhigga iyo wada xaajoodka:________________________________________ _________________Isku darka waqtiga aan ugu talagalay inaan isticmaalo bandhigayga hore:________________________________________________________

# TUULKA 2

## QIIMAYNTA AHAMIYADDA IYO HAWLKARNIMADA MKA

Tuulkani wuxuu siiyaa maamulayaasha iyo kormeerayaasha NGO/CBO-yada hab lagu miisaamo/ qiimeeyo inta uu ballaadh leegyahay qaabkooda maamulidda kartida aadmiga iyo ahamiyadda dhowr xubnood oo la xidhiidha shaqaalaha mushaharka u xaadira iyo xoog-ku deeqayaasha. Qaab qorshe waxqabad ayaa isaguna weheliya iyo qalabka qiimaynta si ay uga taageeraan maamulay-aasha iyo kormeerayaasha inay ku dhaqaaqaan min baadhista qotada dheer ilaa dhammaystirka. Haddii aad tahay maamule ama nin ku takhasusay harumarinta hay'adeed oo la shaqeeya macaamiil NGO/CBO, waxaanu soo-jeedinaynaa inaad toos u gasho weydiimaha la buuxiyo ee qiimaynta ee ku xiga wadahadalka naqshad-dejinta tababarka.

Haddii aad tababare tahay, qaybtan soo socota ayaa adiga laguu qorsheeyey. Iyagoo qiimaynta iyo dookumantiga qorshayntu ay dhan yihiin markay ka dhigan yihiin tuulal maamul oo keligood la isticmaali karo ama ay la socdaan istaraatiijiyado harumarin hay'adeed oo kale, haddana kuwaasi kama saari karaan in loo isticmaalo layli tababar. Si kastaba ha u dhacdee, marka lagu isticmaalayo aqoon-isweydaarsi ku lug leh MKA wuxuu u baahan karaa in ka qaybgale walba uu lahaado khi-brad hay'adeed oo uu wax ku qiimayn karo, kaasoo ka dhigan hab lagu kordhinayo garashadooda xubnaha kala duwan ee lagu soo qaaday/maray weydiimaha meelaha bannaan leh ee qiimeynta.

Ujeeddada Barasho: Si aad u kordhiso aqoonta kaqayb galaha iyo garashada khusaysa xubna-hooda yaryar qaabka MKA ee lagu soo maray weydiimaha Meelaha Bannaan Leh ee Qiimaynta Ahamiyadda iyo Hawlkarnimada MKA.

Kaqayb galayaasha: Tuulkan tababarka waa in la isticmaalaa qudha haddii ay ka qaybgalayaasha tababarku awoodi karaan inay ku xidhiidhiyaan hay'addooda shaqo iyo qaabkeeda MKA. Hadii kale-se qaabka qiimaynta iyo qorshayntu wax ahamiyad ah ma yeelan doono.

Wakhtiga loo baahanayaa: Saacad – iyo badh ilaa laba saacadood

**TUULKA 2: QIIMEYNTA AHAMIYADA IYO HAWL KARNIMADA MKA**

### Hawsha

Talaabooyinka lagu faahfaahiyay faritaanada weydiimaha meelaha la astaamaynayo leh ee qi-imaynta waa inay ku filnaadaan taageerada tababarayaasha inay qabatimaan isticmaalkooda marka la qormaynayo/qorshaynayo aqoon-iswedaarsiga (Workshop Setting). Xaaladaha badankooda waxa laga yaabaa inaad doonto isticmaalka su'aalaha qiimaynta si aad u dar-dargeliso wada xaajood ku saabsan xubnaha kala duwan ee qaababka MKA ee shaqaalaha lacagta la siiyo iyo mutadawaciinta. Xubinta qorshayntu way ka faa'iido yartahay marka lagu jiro qormaynta aqoon-isweydaarsiga, adigoo soo bandhigaya sida uu u shaqeeyo qaabka qorshaynta waxqabad maahee, kaasoo khuseeya isku xidhka tuulka baadhitaanka qotada dheer ee noocan ah (diagnostic tool). Ha

ka maagin inaad naqshad u dejiso sidaad u geli doonto hawsha isticmaalkiisa ku salaysan ujeeddooyinka barasho ee aqoon-isweydaarsigaaga.

**WEYDIIMAHA LA BUUXIYO EE QIIMAYNTA AHAMIYADDA IYO HAWLKARNIMADA MAAMULIDDA KARTIDA AADMIGA**

Su'aalahan soo socda waxa loogu talagalay inay kaa caawiyaan qiimaynta siyaasadaha maamulidda kartida aadmiga ee iminka jira, nidaamyada, iyo dhaqamada ee hay'addaada. Qiimaynta waxa ka kooban saddex sedh oo su'aalo ah oo hoosta isaga daloola/iskaga xidhan.

1. Ma leedahay siyaasadda ama nidaamka, ama sida loo fulinayo dhaqanka gaarka ah ee la qiimayn doono?

2. Haddii aad leedahay, sidee ayaad u malaynaysaa inay u firfircoon tahay siyaasadda, nidaamka, amase dhaqankaasi?

3. Haddii aanad lahayn, sidee ayey muhiim ugu tahay inaad kusoo biirsato barnaamijkaaga MKA?

Qaybta hore ee jawaabaha waxa kaa kafaysa/kaaga filan Haa ama Maya fudud.

Arrimaha aad kaga jawaabtay Haa, waxa lagaa doonayaa qaybta labaad ee khaanadaha jawaabta inaad ku qiimayso karti intay leedahay adigoo u isticmaalaya miisaan ah 1ilaa 5.

**Kow (1)= Karti Ma Leh; Saddex (3) = Waxyar oo karti ah; Shan (5)= Karti aada.**

Hadii jawaabtaadu ay ahayd Maya, ku qiimee sida ay muhiim u tahay inaad arrinkan ku korodhsato barnaaijkaaga MKA, adigoo isticmaalaya miisaanka shanta dhibcood:
1 = Muhiim ma aha; 3 = Ahamiyad yar; 5 = Muhiim aad ah.

Ha taabanin khaanadda xagga midigta ugu xigta jeeroo aad bogatid qiimaynta nooc kasta oo waxqabdka MKA ka mid. Waxa loogu tala galay inay caawimo/taageero ka
geysato qaabka qorshaynta waxqabad ee aanu rabno inaad tixgeliso, marka la dhammeeyo qiimaynta.

Haddii aad leedahay koox maamul, waxaad weydiisan kartaa xubin kasta oo ka mida inuu buuxiyo/dhammaystiro weydiimaha meelaha la astaamaynayo leh ee sahanka iyo hawlaha dabagalka. Marka qof walba uu bogo hawlahan, waxaad qabataa wada hadal qorshe, kaasoo ku saabsan sidaad u harumarin karto barnaamijka Maamulidda Kartida Aadmiga ee shaqaalahaaga iyo mutadawiciinta.

**HAWSHA MKA EE QIIMAYTA IYO QORSHAYNTA: Waxa soo diyaariyey:**

Waxa soo diyaariyey: __________________________(Magaca); kusaabsan:__________________
______________________________(Magacahay'adda);_____________________________________
________________________________(Taariikh)_________________________________________
_________________________________Dhinacyada Waxqabadka Maamulidda Kartida Aadmiga

| Dhinacyada Waxqabadka Maamulidda Kartida Aadmiga | Haa | Maya | Hadii Haa ay tahay, heerka kartida | Hadii Maya ay tahay, heerka ahamiyadda | Waxqa badka |
|---|---|---|---|---|---|
| • Shaqaalaha Mushaharka Qaata | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 1. Tafaasiil shaqo oo qora | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 2. kala saarid qaab oo ku salaysan tafaasiil shaqo | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 3. Magdhow ku salaysan qaabka kala saaridda | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 4. Barnaamij magdhow oo tartanle | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 5. Qaybta xuquuqda shaqo ka mida | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 6. Siyaasad qoraqn oo ku saabsan jagooy-inka shaqo cidda lagu qorayo. | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 7. Shuruudaha iyo nidaamyada shaqa qorista dad cusub | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| • Dhinacyada waxqa-badka ee maamulidda kartida aadmiga | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 8. Shuruudaha iyo nidaamyada lagu xulo tartamaha ugu wacan. | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 9. Barnaamij wacyi gelineed oo ay leeyi-hiin shaqaalaha cusub | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 10. Muddo is barid ama ku-meel gaadha oo loogu talagalay shaqa-alaha cusub. | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 11. Fursado tababar oo loo huro shaqaalaha dhammaantii | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 12. Hawsha dib u dhuga-shada waxqabadka shaqaalaha | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 13. Shuruucda badbaa-dada shaqada iyo nidaamyada | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| 14. Nidargal ku lug leh hagid, barasho gaar iyo awood-siin mas'uuliyado ku salaysan kartida shaqaalaha | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 15. Heerar qoran oo khuseeya anshaxa goobta shaqo | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 16. Nidaamyo qoran oo lagu maareeyo wax-qabadka aan fiicnayn iyo dabeecadda aan la aqbali karin | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 18. Nidaamyo lagu maareeyo shaqa ka saaridda aan loo kasin | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 17. Dhinacyada kale ee looga wareego shaqa ka eriga shaqaalaha dhibta badan | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 19. Qorshayaasha la xidhiidha dhimidda cududda shaqo | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 20. Buugga haga shaqa-alaha ee ka kooban siyaasadaha iyo nidaamyada | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 21. Tafaasiilo shaqo oo qoran | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| • Loo Qorsheeyey Xoog-ku deeqayaasha | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 22. Siyaasad qoran oo khusaysa cidda ku qoran jagooyinka shaqo | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 23. Shuruudaha iyo ni-daamyada lagu shaqa qoro mutadawiciinta cusub oo ku salaysan danayntooda iyo baahiyaha hay'adda | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 24. Meelaynta sal ku haysa danaynta mutadawiciinta karti-dooda iyo baahiyaha shaqo. | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| 25. Wargelinta hay'adda la xidhiidha iyo jagada la buuxin doono | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 26. Tababar shaqada dusheeda ah | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 27. Kormeerid ku lug leh hawl gallada xoog-ku deeqayaasha oo maalin kasta lagu dhaqaaqo | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 28. Dib-u dhugashooyin waxqabad | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 29. Nidaamyo loogu celiyo mutadawici-inta kharashka caqli galka ah ee ay galaan markay ku jiraan hay'ad shaqadeed | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |
| 30. Habab ku habboon aqoonsiga iyo abaal marinta adeegga mutadawaca | | | 1 2 3 4 5 | 1 2 3 4 5 | |

**Faritaano Dheeraad Ah:** si aad u hubiso inaad raacday jahaynta lagu muujiyey weydiiimahan ka hor, bal aynu mar labaad soo akhrino faritaanada. Waxay ahayd inaad ku qiimayso jawaabaha **HAA** oo qudha khaanadda heerka kartida. Dhibicda kow (1) waxay ina tusaysa inaad rumaysan tahay dhinacan barnaamijkaaga **MKA inuu aad u karti daran yahay, dhibicda shantuna (5)** ay inoo sheegayso inuu **karti weyn leeyahay.**
Micnaha dhibcaha khaanadda **ahamiyadda** ee dhammaan su,aalaha aad ku jawaabtay **MAYA** waa u cuyub arrinta hore. Dhibicda sarraysay ee **shanta (5),** tusaale ahaan waxay inoo muujinaysaa in-aad rumaysan tahay astaantan **MKA** inay tahay mid **aad u muhiim ah.** Waxaynu u qaadan karnaa in micnuhu uu yahay tallaabooyinka qaar ay qaaddo hoggaaminta hay'addu ayaa loo baahan yahay si kor loogu qaado xaaladdaada barnaamijka maamulidda kartida aadamaha.

**HAWLGALKA KOWAAD:** Dib u eeg mid kast oo jawaabahaaga ka mida. Haddii aad keen-tay dhibco hooseeya (1 ama 2) khaanadda **HAA-kartida** midna ha ahaatee, doonaysidna inaad tallaabo qaaddo aad ku hagaajinayso heerka kartida xubintan ah barnaamijka **MKA,** waxaaad gelisaa **calaamadda hubinta** (check mark) khaanadda waxqabadka. Dib u eegidda dabadeed iyo muujinta falka loo baahan yahay, hoos waxaad ku taxdaa tirada su,aasha, soo- ururin gaaban oo waxay ka kooban tahay ah iyo tallaabada aad qaadi doonto si aad hore ugu dhigtid hawlkarnimada xubintan barnaamijkaaga **MKA.** Dhammaystir qorshayaal wax qabad oo kala gooni ah oo aad ugu talagasho shaqaalaha lacagta la siiyo iyo kuwa mutadawciinta.

**TALAABOOYINKA LAGU HORUMARINAYO KARTIDA BARNAAMIJYADA MKA EE SHAQAALAHA LACAGTA LA SIIYO: SU, AALAHA 1-20**

| Tiro | Tilmaan kooban oo xubinta ah | Tallaabada aad qaadi doonto ee aad ku harumarinayso firfircoonideeda |
|---|---|---|
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |

**TALAABOOYINKA LAGU HORUMARINAYO KARTIDA BARNAAMIJYADA MKA EE XOOG – KU DEEQAYAASHA: SU'AALAHA 21-30**

| Tiro | Tilmaan kooban oo xubinta ah | Tallaabada aad qaadi doonto ee aad ku harumarinayso firfircoonideeda |
|---|---|---|
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |

**HAWLGALKA LABAAD**: jawaabaha aad bixisay ee ahaa **MAYA** muujisayna inay yihiin qaar ahamiyad leh (dhibicda 4 ama 5) inay xubin ka noqoto barnaamijkaaga **MKA,** waxaad gelisaa c**alaamadda x** xerada waxqabadka. Adigoo xasuusan dhibcaha sarreeya ee xeradan ku qoran inay yihiin kuwa loo fiira yeelanayo, waxaad dhammaystirtaa qorshaha waxqabad ee soo socda ee jidwalka hoos ku yaal.

**TALAABOOYINKA LAGU SOO SAARAYO XUBNAHA MKA EE MUHIIMKA HADDANA MAQAN EE SHAQAALAHA LACAGTA QAATA: SU'AALAHA 1-20**

| Tiro | Tilmaan kooban oo xubinta ah | Tallaabada aad qaadi doonto ee aad ku harumarinayso kartideeda |
|---|---|---|
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |

**TALAABOOYINKA LAGU SOO SAARAYO AHAMIYADDA KA MAQAN XUBNAHA MKA EE MUTADAWICIINTA: SU'AALAHA 1 – 20**

| Tiro | Tilmaan kooban oo xixinta ah | Tallaabada aad qaadi doonto ee aad ku harumarinayso kartideeda |
|---|---|---|
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |

**HAWLGALKA SADDEXAAD:** Adigoo sal uga dhigaya qiimaynahan iyo talaabooyinkan waxqabad, waxaad ku qortaa meelaha bannaan ee hoos ka muuqda qorshe waxqabad. Qorshaha waxqbad waa inuu caddeeyaa:

- **Kumaa hormood ka noqonaya qabashada tallaabooyinka lagu heshiiyey?**

______________________________________________
______________________________________________
______________________________________________
______________________________________________

- **Waa kuma ka kale ee ku biirinaya wax?**

- Maxay yihiin hawlgallada cayiman ee qof kastaaba uu mas'uuliyadooda qaadi doono inuu guto?

- **Muxuu noqonayaa jidwalka loo dejin doonaa hawlgal kasta?**

- **Maxay yihiin alaabooyinka kale, haddii ay jiraan, ee loo baahan doonaa si loo dhammaystiro qorshaha waxqabad**?

- **Sidee ayaad u qiimaynaysaa guusha aad ka gaadho qorshahaaga waxqabad?**

# TUULKA 3

## KHARIIDAD U SAMAYNTAXADKA MAAMULIDDA KARTIDA AADMIGA

Ulajeedada barasho: Layligan waxa loogu talagalay inay ka qaybgalayaashu ka helaan fursad ay isku bartaan oo ay ku bilaabaan raadinta aragtiyo iyo fikrado la xidhiidha maamulidda kartida aadamaha (MKA).

TUULKA 3:
KHARIIDAD
U SAMAYNTA
XADKA MKA

Waqtiga loo baahan yahay: Qiyaastii 60 daqiiqo. Haddii waqti ka badan ay qaadato, waxay u dhowdahay inay u sabab tahay ka qaybgalayaasha oo la yimid khariidado wacan oo xadka ku saabsan oo lagaga faalootamayo aqoon-isweydaarsadka. Dib u habee waqtigaaga iyo xiisayaashaadaba hadba xilliga ay qaadato.

**Hawsha**

1. Waxaad siisaa ka qaybgale kasta saddex ama afar kaadh oo ah kuwa tilmaamaha xidhiidhsan (index cards). Waxaad weydiisataa inay ku qoraan kaadh kasta eray qudha ama caddayn kooban oo ka tarjumaysa fikrad ama dareen ah waxa ay ictiqaadsan yihiin inay MKA ku jirto. Waxaad xasuusisaa inay kaadhkiibba geliyaan fikrad qudha.

2. Waxaad weydiisataa in marba qof istaago, isbaro inta kale oo uu kolkaas akhriyo wixii uu ku qoray kaadhadhka.

3. Kadib marka qoraalada kaadhadhka ku qoran la akhriyo, waxaad ka codsataa ka qaybgalayaasha inay ku dhejiyaan kaadhadhka gidaar loogu talogaly in warka lagu bandhigo.

4. Waxaad u kala jebisaa ka qaybgalayaasha saddex ama afar kooxood oo yaryar oo midkiiba aanay lix ka qaybgale ka badnayn, waxaanad u dirtaa inay unkaan khariidad aragtiyeed ee fikradaha la soo bandhigay/hordhigay. Waxaad xasuusin kartaa, mar hadii kollayba ay cidi ku weydiin karto, in khariidad aragtiyeedku (conceptual map) ay tahay hab foodda laysu geliyo laguna showro (cluster) lagu habeeyo fikrado, war, warbixino iyo arrimo yaryar oo kale oo ku lug leh meel fog wax ka garadka si ay u xambaarsanaadaan xaydaan fikir ah oo ku saabsan mowduuc gaar ah, sida maamulidda kartida aadmiga. Khariidadahaasi si fudud ayey u muuqan karaan haddii lagu dul sameeyo waraaqaha joornaalada ee khafiifka ah.

5. Waxaad kooxaha ka codsataa inay so bandhigaan/ soo kala bixiyaan.maababkooda aragtiyeed si loo gorfeeyo/loo qaadaa dhigo. Haddii kolkaas ay  muuqato “khariidad” guud ahaaneed oo MKA ah inay ka soo baxayso dadaaladii kooxaha kala duwan, waxaad unugtaa maab jacbur ah (composite map) /maab isku-dhafan oo aad isticmaali karto inta ka hadhay aqoon-isweydaarsiga oo dhan.

# TUULKA 4:

## GARASHADA DOORKA SIYAASADEED EE MKA

Tiro ka mid ah inta hadhay tuulalka ayaa qoraal ahaan ku wareegsan baahiyaha gaarka ah ee maamulidda kartida aadamaha ee la xidhiidha xoog-ku deeqayaasha mar haddii ay masilaan/ka dhigan yihiin awood muhiim ah hay'adihiina inta badan iyo sedh nadir ah oo ka kooban niibo maamulka ka horyimaadda, waxaanu ka fakirnay xoog saaridda mutadawiciintu inay tahay arrin faa'iido leh. Si kastaba ha ahaatee, waxaanu rabnaa inaanu si dhakhso leh kuu xasuusino in mid kasta oo ka mida carbisyada soo socda si fudud loola qabsan karo si loogu iftiin –celiyo maamulka labada nooc ee shaqaaaleba.

Ulajeedoonyinka barasho: Carbiskan waxa loo qoondeeyay inay ka taageerto ka qaybglayaasha inay gartaan una bogaan ahamiyadda ay leeyihiin siyaasadaha qoran ee ku saabsan hawlgallada hay'adahooda iyo barnaamiyada.

Waqtiga loo baahan yahay: Qiyaastii laba saacadood: shan-iyo-toban daqiiqo oo la baro carbiska; saacad ay ku jiraan wadahadallo ku lug leh kooxo-yaryar oo hawl qabatima; iyo ugu dambaynta soddon ilaa shan-iyo-afartan daqiiqo oo ah wadaxaajoodyo ku saabsan warbixinaha iyo shirweynaha gaar ee loo dhan yahay (plenary); Layliga waa la sii fidin karaa, haddii ka qaybo galayaashaadu ay rabaan taxanayaal qabyo-qoraal oo ku lug leh warbixino siyaasadeed inay sameeyaan, kuwaasoo ku salaysan fikradaha ka soo booda hawl galka koox yarta.

**Hawsha**

1. Waxaad marka hore bartaa carbiska adigoo raacinaya wada hadal hagan oo ku saabsan micnaynta siyaasadaha iyo sida ay ku samaysmaaan. Halkan waxa ah fikrado yar oo ku lug leh siyaasadaha si ay u fahamsanaadaan / uga dhaadhacdo, Inta badan waxaanu ka dhignaa hawsha siyaasad dejinta mid aad uga murugsan siday tahay inay noqoto. Siyaasaduhu waxa weeye caddaymo ku talagal leh, hagitaano aynu ku xidhiidhino tallaabooyinka waxqabad. Waqtiyada qaar caddaymahaas ayaa loo rogaa dookumantooyin sharci ah, taasoo ku kordhisa culays badan marka la akidayo/la suurta gelinayo dhammaystirkooda. Tusaale, kuwamaa sameeya siyaasadaha. Dhinaca NGO iyo CBO-yada, waxa laga yaabaa inay yihiin Golaha Agaasimiyaasha (mulkiilayaasha), haddii hay'addu ay ku shaqayso/leedahay qaar noocaas ah, amase agaasimaha fulinta. Siyaasadaha qaar ayaa lagu tilmaamaa astaamaha dabeecadahooda, kuwaasoo gaadha heerar ay xeer ku noqdaan muddo dheer kadib tusaale. hay'ad ayaa xad u yeeli karta deeq ururinteeda sannadkii ay ula tagto ganacsatada dalka gudihiisa, sababtuna ma aha waxay leedahay siyaasad qoran oo ku saabsan deeq ururinta ee waxa weeye hay'addu weligeedba sidaas ayey yeeli jirtey. Marka agaasimaha la weydiiyo waxa ugu wacan waxay tidhaahdaa, "siyaasadayada ayaa nocaas ah". Waxaad dhugataa sawirka 1.2 ee Jiska 1 Qaybta Kow wixii fikrado ah ee intaas dhaafsiisan.

2. Waxaad u qaybisaa ka qaybgalayaasha kooxo yaryar oo ay midkiiba tahay afar ilaa toddoba qof, waxaanad ka dalbataa inay ku qaataan waqti ah qiyaastii 45-60 daqiiqo isku dubaridka liis warbixino siyaasadeed ah oo u noqda hagitaan maamulidda xoog- ku deeqayaasha ay shaqa qorayso hay'ad cusub oo loo aasaasay inay la shaqayso carruurta dibjirada ah ee magaalada. Waxaad isticmaashaa maankaaga iyo nidamyada dhaqan/caadooyinka si aad ugu diyaariso xaydaano go'an (parameters) ka qaybgalyaasha isla markay hawshan gelay-

aan. Waxaad la socodsiisaa inay caawimo u noqon karto inay uga fakiraan siyaasadahan sida uu hadba u arko qofka mas'uulka ka ah maamulidda shaqada mutadawiciinta, iyo ciyaalka suuqa ee ay la shaqaynayaan intaba.

Hawlgelidda kale ee looga wareegi karo hawl kooxeeddan waxa ku jiri kara saddex kooxood oo loo diro inay ka soo qaban qaabiyaan liis warbixino siyaasaadeed ah saddexda aragtiyood ee aynu iminka soo sheegnay: maamulaha mutadawiciinta, mutadawiciinta shaaraca ka shaqaynaya, iyo carruurta suuq joogga ah. Sida saddexaad ee looga wareegi karaa waxay tahay inaad diyaariso xaalad adiga uun kuu gaar ah, mid la jaanqaadda baahiyaha barasho ee kooxdaada. Mid kasta oo aad ka doorato isticmaalka lagu, sharxayo hawshooda, waxaad ka dalbataa kooxo hawleedyada inay dib kaaga warbixiyaan liisaskooda ku yaalla waraaqaha jilicsan ee joornaalada lagu daabaco si ay u hor dhigaan ka qaybgalayaasha kale.

3. Dib isugu yeedh kooxaha, waxaanad ka codsataa inay ka warbixiyaan. Waxaad ku koobtaa su'aalaha kala caddayn/kala qeexid ilaa iyo inta kooxohoo dhammi ay imanayaan. Waxaad is garab dhigtaa natiijooyinka wadahadalada kooxaha, si aad u hesho warbixino isku noqnoqonaya, farqiyo, iyo wax lama filaano ah. Adigoo ku shaqaynaaya shir aan cidi ka maqnayn, dib u eeg liistooyinka kala duwan, waxaanad ka caawisaa kooxda inay ka gaadhaan ra'yi guud liisas ka kooban siyaasado cayiman oo ay kula taliyaan hay'addan cusub inay qaadato hagitaan ahaan si ay ugu maamusho xoog-ku deeqayaasha kala shaqayn doona yaryarka suuq-joogga ah magaaladooda (ama xaaladda adigu aad doorbiddo tababare ahaan,)

4. Intaanad dib ugu celin tuulkan kolaygii, dib ugu laabo wadahadalkii khuseeyey ahamiyadda ay xambaarsantahay dejinta siyaasaduhu iyo natiijooyinka ka dhasha la'aanta siyaasado cad oo MKA ay leedahay oo ku lug leh xoog-ku deeqayaasha la shaqeeya NGO iyo CBO-yada.

# TUULKA 5:

## QORITANKA OGEYSIISYADA SHAQO

Ulajeeddada barasho: In kor loogu qaado aqoonta iyo tabaha ka qayb galayaasha xagga diyaarinta ogeysiisyada shaqo.

Jiska 2, sawirka 2.1, waxa jira ogeysiis shaqo oo faahfaahsan khuseeyana Xidhiidhiye Adeeg Mutadawac. Waxaanu ku talinaynaa inaad kaas u isticmaasho tusaale ahaan si aad uga caawiso ka qayb galayaashaada tababar inay bartaan siday u qoraan ogeysiisyo shaqo oo natiijooyin ku jihaysan.

Isticmaal qiyaastaada iyo baahiyaha ka qayb galayaasha markaad go’aan ka gaashayso sida aad u dhisi doonto hawlgalka qoraalka ogeysiisyo shaqo. Waxaad dhismaha uga shidaal qaadan kartaa natiijooyinka layligii hore, Tuulka 4, kuwaasoo aad ka soo qaadan karto mid ama laba jagooyinka shaqaalaha ka mid ah, kuwaasoo looga baahan doono inay la shaqeeyaan carruurta suuq-joogga ah.

TUULKA5:
QORITANKA
OGEYSIISYADA
SHAQO

Arrinka kale ee la soo qaadan karaa oo aanu isleenahay wuu ka faa’iido badan yahay, wuxuu yahay in loo diro ka qayb galayaasha inay qoraan ogeysiisyo shaqo iyagoo ku salaynaya baahiyaha hay’addooda ee hadda taagan iyo khibradda. Tusaale, waxa laga yaabaa inay maskaxda ku hayaan inay ku soo kordhiyaan qof shaqaale ah oo cusub ama ay hayaan ogeysiin shaqo oo jago cayiman oo hay’adda ah oo aan hadda baahiyahooda ku jirin. Labada siyoodba, waxay ka faa’iidaysan karaan iyagoo ka fakira baahiyahaas gaarka ah oo ay usii maraan aqoon-isweydaarsi ku saabsan MKA.

**Waqtiga loo baahan yahay:**
Kani waxa weeye mid ka mida ujeeddooyinka barasho ee si hawlyar u qaadataa waqtiga loo qabtay. Iyadoo ku xidhan sida aad ula rabto ka qayb galayaashu inay u noqdaan tabyaqaano markay qorayaan xayeysiiyada shaqo, qodobkani wuxu qaadan karaa maalin dhan. Intii la sheegi lahaa waqti go’an oo lagu fuliyo layligan, waxaanu soo jeedinaynaa inaad ka qiyaasto baahiyahaaga waqti adigoo ku salaynaya:

- baahiyahaaga tababar ee ka qaybgalyaashaada; iyo,
- heerkooda aqooneed, xirfadeed, iyo khibradda ay u yeeshaan qoridda xayeysiisyada shaqo.

**Hawsha**

1. Waxaad ku bilowdaa carbiskan wada xaajood hagan oo ku saabsan waxay ka koobnaan karto tafaasiil shaqo oo karti leh kuna tiirsan murtida faahfaahsan ee Jiska 2. Waxaad qorshaysataa qiyaastii saacad inaad ku jirto murtidan iyadoo si qotafog loo lafa gurayo

2. Iyadoo ku xidhan qorshaha riwaayadeed/masraxiyadeed (scenario) ee aad u doorato isticmaalka yagleel ahaan si ay ka qaybgalayaashu tababar ugu qaataan qoraalka tafaasiilaha shaqo ee natiijooonka ku hadafaysan, waxa laga yaabaa inaad u bahato inaad waxoogay waqti ah ku qaadato tilmaanta murtiyeed ee looga haahdo tafaasiilaha la rabo in la galo.

3. Mar allaale marka la go’aansado/la helo baahida tafaasiilo shaqo oo cusub, wuxu ka koobnaan doono dookumantiguna si qota fog loo sharxo, waxaad u kala saartaa kooxo shaqo oo ka koobnaada inta u dhexaysa saddex ilaa afar qof. Hawl kooxeedkoodu wuxu ahaanayaa inay ku dhaqaaqaan tafaasiil shaqo oo salka ku haysa qorshaha riwaayadda la isku raacay. Waxaad u qaybisaa waraaqaha khafiifka ah ee joornaalada si ay ugu sajilaan faahfaahintooda. Hawshaas waxaad u qabtaa qiyaas ahaan 45 daqiiqo.

4. Dib-isugu yeedh kooxaha kana dhegeyso warbixinaha dedaalkooda. Kadib markay kooxaha dhammaantood  warka dhiibaan, waxaad qabataa wadahadallo qota dheer oo ku saabsan tayada tafaasiilaha shaqo, qaybaha qorriinkoodu uu ku adkaaday, iyo maaddooyinka kale ee ay ku salaysan yihiin baahiyahooda barasho.

5. Iyada oo ku tiirsan arrinka aad doorbidday in aad ku tallaabsato markaad ka caawinayso ka qaybgalayaashaada  inay sii kordhiyaan xirfadahooda geesta qoritaanka tafaasiilaha shaqo, waxaanad u diri kartaa ka qayb gale walba inuu saacad ama laba saacadood gudahood ku qaato qoridda tafaasiil shaqo oo ku salaysan shaqo cayiman oo hay’addooda ah, taas oo aan lahayn caddaymo xilal rasmi ah, iwm, ama mid ay hadda ka fakirayaan inay billaabaan. Dedaaladaasi waa in lala socodsiiyo kooxda guud lana naqdiyo/lagana faallootamo

# TUULKA 6:

## QODOBKA U BEDDIDA: YOWMIYAHA, MUSHAHAROOYINKA IYO XUQUUQA-HA

TALABIXIN SOCDAAL

Ka caawinta maamulayaasha NGO iyo CBO-yada xisaabinta/soo saaridda waxay siinayaan lacag ahaan shaqaalahooda ayaa noqon karta niibta ugu adag ee hawsha tababarka. Hay'addaha ugu waawayn mooyee inta kale, waxa laga yaabaa inaanay wax faa'iido ah oo weyn ku qabin qaabka dhammaystirka kala shaandhaynta/kala saaridda shaqooyinka. Haddii aad xasuusan tahay Akhristaha (Reader), wuxuu noqon karaa qaab murugsan oo ku lug leh qiimaynta/miisaamidda shaqo kasta oo ay hay'addu leedahay iyada oo lala eegayo shaqo kale lana isticmaalayo tiro door ah oo qodobo firfircoon oo sharaxya leh. Hay'adaha yaryar intooda badan waxay u dhow yihiin inay isku dayaan inay noqdaan qaar tartan geli kara, ku salaysan suuqa dalka gudihiisa ah ee awoodaha cayiman (Specific Competencies) amase waxay ku tallaabsan karaan hawlgal jawaab-celin leh, sida rafaad-mudashada (scrambling) ku lingaxan war-raadinta si ay waxoogay lacag ah oo dheeraad ah u siiyaan shaqaalahooda qiimaha leh, markay go'aansadaan inay raadiyaan xalal ka wacan kuwii hore (greener postures). Dhacdo ahaan, ma rabno inaanu idin kula talino hawlgelidda noocan ah, ha yeeshee waxaanu u bogaynaa sababta ay NGO iyo CBO-yo badani ay halkan ugu shaqeeyaan. Hay'addaha doonaya inay u roonaadaan shaqaalahooda/caddaalad ku shaqeeyaan, si simana ay shaqaalahooda ugu bedaan, waxaanu rumaysanahay inay isku hawlaan noocyo qaabab ah oo kala shaandhayn shaqooyin leh, kuna xidha qaababkaas sahano xilliyeed yawmiyaha/mushqaayadda ah.

Kolka aynu haysano farriimahan aad mooddo inay iska hor imanayaan, maxay tahay inaad ku dhaqaaqdo marka laga eegayo dhinaca aragtida tababar ee wax u tari karta maamulayaashu inay hirgeliyaan tallaabadan MKA ee muhiimka u ah hawshan? Naqshad - dejintan tababar waxay qabtaa inaad u baahan tahay inaad ku soo marto dhinacan MKA aqoon- is waydaarsi kasta oo ku lug leh MKA laakiin aanad isku hawlin gelitaanka tababar xirfadeed oo ku saabsan kala saarid shaqooyin. Haddii ay baahidu timaaddo, waxaanu soo jeedinaynaa inaad sahan ku kala bixiso NGO-yada waaweyn ee si wacan u habaysan ee goobta aad deggan tahay ka dhisan si aad u aragto inay dhammaystireen barnamijka noocan ah. Haddii ay dhammaystireen, waxa laga yaabaa inay ogol yihiin inay kaa taageeraan naqshad-dejinta iyo fulinta barnaamij loogu talagalo dadka raba inay bartaan sida loo harumariyo qaab u bedid salka ku haya kala shaandhayn shaqooyin.

Ujeeddo Barasho: In kor loo qaado aqoonta ka qayb galaha iyo garashada dhinacyada kale ee looga wareego aasaasidda qaabab magdhaw oo loo siman yahay laguna tartami karo.

Wakhtiga loo baahan yahay: In aan ka badnayn saddex saacadood, taasoo ku xidhan waxaad go'aansatay inaad ku fuliso mawduucan.

**Hawsha**

TUULKA 6: QODOBKA U BEDDIDA YOWMI-YAHA IYO XUQUUQDA

Waxa laga yaabaa inaad doonayso inaad isticmaasho khudbad jeediye marti ah oo aad ka keento hay'ad ka baxsan bulshada maamulayaasha NGO iyo CBO-yada ee ka soo qayb gelaya aqoon-iswaydaarsigan. Waxaad ka codsataa ninka martida ah inuu ka  dhigo bandhig kooban oo khibraddiisa ku lug leh harumarinta iyo dhammaystirka barnaamijka u beddida iyo tartan gelinta shaqaalahooda ee laga siman yahay. Waxaanu ku salaynaynaa soo jeedintayada suurtagalnimada in maamulayaal waddaniyiin ah oo ka shaqeeya NGO ama CBO- yadu ay u diyaar noqon waayaan inay la wadaagaan ra'yigooda la xidhiidha mawduucan dadka ay is leeyihiin waa tartamayaashiina isla xirfadahan ee suuqa. Haddii aad go'aansato inaad keento khudbad jeediye marti noqda, iyo haddii aad shakhsi ahaan mowduuca soo bandhigtaba, waxaad ku dartaa arrimahan soo socda.

- Ahmiyadda ay leedahay harumarinta qaabka u beddida ee ay ka siman tahay cududda shaqo ee hay'adda gudaheeda tartan galna ka ah suuqa.
- Xubnaha uu ka kooban yahay qaabka kala saaridda shaqooyinku, habka uu ugu xidhan yahay hawlgallada kale ee MKA, sida magdhawga lacageed iyo shaqo qorista, iyo waxy-aalaha ku jira haru dhigidda qaab kala shaandhayn oo noocan ah.
- Sida loo qabto sahan suuq oo ku lug leh mushqaayado iyo mushaharooyin.
- Kala doorashooyinka wax ka beddelka mushqaayadaha: Aqoonsiaga sida loo kala derajo sarreeyo iyo adeegga muddada dheer, wax ka beddelka ku saabsan qiima nololeedka, iyo korodhsiimooyinka shaqo wanaagga.
- Xuquuqaha lagu ladho mushaharooyinka/mushqaayadaha waa qayb muhiim ah oo ka mid ah kuus magdhaw oo kasta (any compensation package).

Mid kasta oo ka mida mawaadiicdan yaryar, waxa lagugu dhiirri geliyey inaad dhisto fikradaha ku yaalla rafiiqa buuggan "Akhristaha" (Reader) iyada oo ay la socdaan tusaalooyin laga soo qaatay khibrado NGO/CBO- yo waddaniyiin ah ee goobahan muhiimka ah ee MKA. Dhammaan shaqaalaha NGO/CBO- yada dalka gudihiisa kuwa ugu sarreeya iyo xirfadlayaasha sare ma ahee, meelaha laga soo qorto kartida aadamaha/shaqaalaha cusub waa qaar dalka gudihiisa ah. Ammuurtaas markaad ogtahay, waxa muhiim ah in dareenka la saaro nidaamyada suuqa wad-daniga ah marka la rabo dad aqoon iyo khibrad leh.

Bandhigga rasmiga ah ee khuseeya kala doorashada (options) xisaabinta heerar mushahar iyo tar-tangelinta, waxa laga yaabaa inaad doontid ku soo kordhinta layli kooxyarta ah si ay uga dhashaan fikrado ah nooca aan xuquuqda mushaharka raacda ee aan caadiga ahayn ee NGO iyo CBO-yadu ay siin karaan shaqaalahooda iyo xoog-ku deeqayaasha.

Marka aanu leenahay "aan caadiga ahayn" (non-traditional) waxaanu uga jeednaa kuwa ka baxsan xuquuqda bulsho ee dawladdu ay amarto iyo kuwa hay'adda ee ay ka mid yihiin siyaasadaha fasaxyada, fasaxa bukaanka, qorshayaasha caafimaadka, iwm. Waxaad fiiro u yeelataa waxyaalo

kuwa hoos ku qoran la mida:

1. Waxaad u qaybisaa ka qayb galayaasha laba ama afar kooxood oo midkiiba ay tahay shan ilaa toddoba qof, taasoo ku xidhan hadba tirada guud ee joogta aqoon-isweydaarsigaaga. Waxaad siisaa 20 daqiiqo oo ay isku dubaridaan liis ka kooban xuquuqda aan caadiga ahayn ee NGO iyo CBO – yadu ay siin karan shaqaalahooda. Waxaad u xilsaartaa kooxaha badhkood inay ku qaybaan hawsha ah diyaarinta liiskooda khuseeya shaqaalaha lacagta la siiyo, badhka kalena mutadawaciinta. Waxaad u dirtaa inay fikradahooda ku qoraan waraaqo balballaadhan oo ah kuwa joornaalada lagu daabaco. Waxaad ku dhiirrisaa inay isticmaalaan xeelad/tab maskax-daalis ah oo ay ku kordhiyaan wax abuuridda (brainstorming technique to enhance creativity) waxaanad xasuusisaa in xuquuqda yar ee aan lacagnimo loo bixin inteeda badani ay ka dhalatay fikrado wax abuur leh.

2. Dib isugu yeedh tiimamka dabadeedna waxrbixinaha ka dhegayso, adigoo su’aalo keliya ka waydiinaya soo bandhigid kasta kadib. Markay kooxaha dhamaamntood bogaan bandhigyadooda, wadaxaajoodka waxaad ku furtaa waxyaabo isku mid ah, farqiyada, fikradaha cusub iyo kuwa kala geddisan, iyo kuwa ay rabaan inay isku dayaan xagga hay’addooda.

Ha ka maagin inaad hawlgallada ka beddesho carbiskan si ay u waafaqdo baahiyaha barasho ee ka qaybgalayaasha. Tusaale ahaan, waxa laga yaabaa inay doonaan inay ku shaqeeyaan kooxo yaryar ee baahiyaha u beddida ee shaqaalaha saacadaha qayb ka mida shaqeeya, ama sida magdhaw loo siiyo xoog ku deeqayaasha, haddii arrinkani uu ku weyn yahay caalamka aad ku nooshahay. Si kale markaynu u dhigno, waxaad isbeddel ku samaysaa carbiska si uu ugu munaasib noqdo baahiyaha kooxdaada tababar.

# TUULKA 7:

## HAWSHA SHAQA QORIDDA Iyo KIRAYSIGA

Ujeeddo Barasho: In lagu kordhiyo aqoonta ka qayb galaha iyo tabaha lagu kiraysto/adeegsado shaqaale aqoon leh

Wakhtiga loo baahan yahay: Saddex saacadood oo ay ku jiraan;

- 15 daqiiqo oo looga warramayo kooxaha dhowrka ah doorarkooda iyo xilkooda,
- 45 daqiiqo oo ay ku diyaariyaan bandhigyadooda iyo doorarka,
- 60 daqiiqo oo loogu talagalay bandhigyada (midkiiba 15 daqiiqo),
- 30 daqiiqo oo ah su'aalo weydiin ay la yimaaddaan kooxda daawadayaasha/ilaalada, iyo
- 10 daqiiqo oo ah dhammaystirka guusha leh iyo qiimaynta carbiska.

TUULKA 7:
HAWSHA SHAQA
QORIDDA IYO KIRAYSIGA

**Hawsha**

Hawshani waa ka yeelyeelid/masilaad ku lug leh laba ama afar kooxood oo lataliyayaal MKA ah, guddi dib u dhugasho oo hal NGO ka socda, iyo goobjoogayaal (observers). Guddigu waxay u dirtay codsi soo jeedino ah (csj) tiro la taliyayaal waddaniyiin ah, kuwaasoo takhasus u leh shaqo qoridda shaqaale xirfadlayaal sare ah ee la xidhiidha NGO iyo CBO-yada gobolka. Waxay ku muujiyeen CSJ (RFP) in shirkadaha amase ashkhaasta la timaadda soo-jeedinaha ugu fiican in laga dalban doono inay shakhsiyan soo hordhigaan soo-jeedinta shir gaar ahaaneed oo ay leedahay guddidu. Tafaasiilaha xaaladda ee hoos ku qoran iyo doorarka waxa loo qorsheeyay inay ka caawiyaan tababaraha inuu maamulo jiliddan. Ha ka maagin inaad isbeddel ku samayso tafaasiil- ahan si ay u waafaqaan naqshad dejintaada barasho ama baahiyaha barasho ee ka qayb galayaashaada.

Tirada dadka ku jira xubno ahaan kooxada la taliyayaasha, guddida, iyo goobjoogayaashu waxay ku xidhnaan doontaa isku darka tirada ka qaybgalayaasha jooga aqoon-isweydaarsigaaga. Haddii ay suurtagal noqoto, kooxaha la talinta waxaad ka dhigtaa in aan ka badnayn afar qof, guddidana saddex ilaa afar qof, iyo inta ka hadha ka qayb galayaasha aqoon-isweydaarsiga oo masila doorka goobjoogayaasha.

Xaaladda: Magaalo–weynta Soul waxa dhawaan lagu gebagebeeyey si guul wadata gorgortan lala yeeshay shirkad kabaha soo saarta oo caalami ah inay dejiso fududayn wershadeed meel ugu dhaqaale iyo bulsho liidata magaalaweynta. Heshiiskii ugu danbeeyey ee labada dhinac, magaala-weyntu waxay ogolaatay inay maalgeliso xarun xannaano oo dharaartii ah oo xigta fududaynta wershadeed si ay u taageerto hooyooyinka sukaha ah (single mothers) ee ka shaqa geli doona wershedda. Mar haddii magaalaweyntu aanay lahayn shaqaale amase amar ay kaga hawlgasho barnaamijyo

xannaano dharaareed, waxay qandaraas la galeen “Carruurta Faraxsan” (Happy Kids), hay’ad aan dawladda ahayn – NGO oo ku takhasustay adeegyada bulshada oo loogu talagalay kuwa dhaqaale ahaan wax faa’iido ah aanay soo gelin. Aggaasimaha Fulinta ee Carruurta Faraxsan isaguna dhiniciisa wuxuu go’aan ku gaadhay inuu qandaraas ku bixiyo shaqa qoridda iyo xulashada agaasime loo qaato xarunta xannaanada dharaareed ee cusub, siiyana la taliyaha MKA ama shirkad talabixineed. Ogeysiinta/xayeysiiska soo socda ayaa loo diray la taliyayaal door ah oo MKA iyo shirkado si ay rasmi ahaan ugu tebiyaan dantooda iyo soo-jeedinahooda.

Ogeysiiska: Carruurta Faraxsan waxay codsanaysaa soo-jeedino ay ka hesho shirkado ku habbon oo fuliya/hirgeliya hawsha shaqa qorista iyo xulidda jagada Agaasimaha, Xarunta Xannaanada Maalineed ee Xadhkaha Kabaha (AXXMX). Agaasimuhu wuxuu ka mas’uul noqon doonaa maamulka wershedda, shaqaalaha, iyo hawlgallada barnaamijka. AXXMX waxay ku shaqayn doontaa barnaamijyo laba-xilli oo midkiiba lagu jirayo toddoba saacadood si ay u tiiriyaan saamamka/xilliyada aroortii iyo galabtii wershedda kabaha oo ay ka hawlgeli doonaan isugeyn ah toban isugu jira barayaal iyo shaqaale taageera iyo lixdan carruur ah. Wixii war ah ee dheeraad ah ee ku saabsan hawlaha iyo shaqaale qorista Xarunta waxay diyaar ku ahaanayaan wargelin laga bixiyo Xafiiska Dhexe ee Carruurta Faraxsan bmt (taariikhda aqoon-isweydaarsiga)

Waxa la filayaa soo-jeedinadu inay ka sheekeeyaan: Soo-ururin ka kooban habka aad u shaqa qori doonto jagadan, tusaale ah xayeysiiska shaqo, iyo talooyin ku lug leh hawsha xulidda ee ugu danbaysa, isaga oo uu ku jiro isticmaalka foomka codsiga ee caanka ah, baahiyo tijaabo oo suurta gal noqon kara, iyo hubinta tixraacyada.

Guddiga Dib u Dhugashada Soo-jeedinta: Guddida dib u dhugashadu waxay ka kooban tahay Agaasimaha Fulinta, NGO-ga Carruurta Faraxsan, kaaliyaheeda ka mas’uulka ah MKA, iyo xubin ka tirsan Waaxda Xafiiska Shaqaalaha ee Magaalaweynta. Guddidu waxay qabanaysaa kulan baadhitaan afka ah oo ay la yeelanayso saddexda shirkadood ee tartanka ku jir amase la taliyayaal, kuwaasoo dib u eegaya dookumantooyinkooda. Guddida dib u dhugashada waxa laga filayaa inay diyaariso shuruudo lagu qiimeeyo soo-jeedinaha, go’aan inay ka gaadho shirkadda ama la taliyayaasha ay qorsheeyeen inay siiyaan qandaraaska, iyo inay muujiyaan/caddeeyaan daliilada ay ku gaadheen go’aankaas.

La Taliyayaasha MKA: Iyagaoo ku hawlgelaya kooxo ka kooban laba ama afar qof, la taliyayaashu waxay diyaarinayaan oo ay soo bandhigayaan soo-jeedintooda ku saabsan shaqa qoridda iyo xulashada Agaasimaha Xarunta Xannaanada Maalineed ee Xadhkaha Kabaha ee dhawaan la aasaasay. Koox walba waxa lagu miisaamayaa/qiyaasayaa dhammaystirka iyo heerka unkidda ay yeelato hawshooda soo-jeedinta shaqa qorista iyo xulashadu.

Kooxda Goobjoogayaasha Ah: Kooxdani waxay ka mas’uul noqonaysaa ilaalada kulanka baadhitaanka ee ay qabteen guddiga dib u dhugashada iyo inay qiyaasaan tayada kulamada baadhistu iyo go’aanada ugu dambeeya. Waxa laga codsan doonaa inay cabbiraan/sheegaan ra’yigooda marka la bogo masilaadda/jilidda. Kooxdan waxa laga filayaa inay diyaar ka dhigaan shuruudo lagu qiimeeyo hawsha kulanka baadhitaanka iyo go’aanka ugu dambeeya ee guddida.

Layligani wuxuu deyayaa gees qudha oo ka mida hawsha shaqa qorista iyo kiraysiga. Waxa jira ar-

rimo badan oo kale oo la jalleeci doono, waxaanu kugu dhiirrigelinayaa inaad hindisto dhacdooyin barasho oo ka warrama kuwa ugu muhiimsan goobjoogayaasha tababar. Had iyo jeer waa fikrad wacan inaad isku daydo inaad raadiso (canvass) kooxdaada tababar ee meel tiigsadka leh intaanad dejin naqshadda aqoon-isweydaarsi ka hor, adigoo deyaya mowduuc sida MKA/HKA si aad u ogaato baahiyahooda tababar waxay yihiin iyo si aad u nashqad dejiso dhacdooyinka tababar ee ku salaysan baahiyaha ay sheegteen/caddeeyeen. Tusaale, waxa laga yaabaa inay doonayaan inay warar dheeraad ah ka helaan sida looga dallacsiiyo shaqaalaha isla kuwa isku derajooyinka ah dhexdooda ama si loo abuuro hawsha shaqa qoridda iyo xulashada, sida ta ay isticmaasho KHTC-BA, sida lagu faahfaahiyay Qaybta Kow ee Buuggan Faraha ah.

# TUULKA 8:

## SHAQAALAYNTA XOOG-KU DEEQAYAASHA

TALA BIXIN SOCDAAL

Ujeeddada Barasho: In kor loogu qaado aqoonta iyo tabaha lagu qorshaynayo laguna hirgelinayo barnaamijka shaqa qorista iyo meelaynta xoog ku – deeqayaasha.

Waqtiga loo baahan yahay : Qaybtan jilidda ah ee hawlaha qorshaynta waxa laga yaabaa inay noqoto khibradda ugu weyn ee aqoon isweydaarsad maalin qudha ah . Waxaanu idin la socodsiin doonaa tafaasiisha la xidhiidha waqtiga lagu jiro wada- xaajoodka hawsha.

Mar hadii istimaalka mutadawiciintu uu aad muhiim ugu yahay hawlgalka NGO/CBO-yo badan , waxaanu rumaysanahay inay waxtar noqon karto in la siiyo fursad tababar oo xoogga saarta shaqa qoridda iyo meelaynta xooga–ku deeqayaasha. Iyadoo aanu diyaarinay layli jilid ah oo khuseeya CBO (HDHB) oo dhibaato bulsho ay xoogsaarid u tahay , waxaanu kugu adkaynaynaa inaad dib uraajacdo /dib ugu noqoto hawsha si ay dareenka usaarto baahiyaha runta ah ee maamulka mutadawiciinta ee ku saabsan mid ama ka badan NGO/CBO-yada aad macmiilka u tahay.

**Hawsha**

Dhacdadan tababar ee la soo jeediyey waxay ku qotontaa hawlo xidhiidhsan oo ay kooxo yaryari hirgelinayaan. Hawsha waxa looga dan leeyahay inay ka caawiso ka qayb galayaasha inay ka fakiraan xagga tallaabooyinka dhowrka ah ee khuseeya qorshaynta shaqa qorista iyo meelaynta mutadawiciinta. Qorshahan riwaayadeed (scenario) ee soo socda waxa loo isticmaali karaa sal ahaan dhacdo barasho oo wax laga beddelay si ay ugu ekaato xaqiiqada niibaha ka horyimaadda NGO iyo CBO–yada ee ay haddana maareeyaan ee goobta aad deggan tahay ama loo istimaalay aalad naqil/ sawir oo loogu tala galay naqshad –dejin barassho oo ku dhow- dhow baahiyaha runta ah.

Xaaladda: Magaalo ku taalla meel uu webi weyni ku kala qaybsamo ayaa la kulantay fatah/butaac is daba joog ah sannado gudahood, kaasoo sababay khasaare weyn iyo waxyeello ah burbur iyo dhaqaala xumaan soo gaadha dad fara badan oo ku nool tuulada. Muwadiniinta halkaas degganaa waxay noqdeen qaar marka horeba filayey aafooyin dabiici ah oo noocaasoo kale ah inay ku dha-caan qaddarka Ilaahay, waxay markaas u arkeen dhibaatadaas ku habsatay inaanay waxba ka qaban karayn oo aan waxba is dhibin, waxaanay u arkeen inay tahay qayb ka mid ah wuxu aayahoodii ku danbeeyey (their fate). Si kastaba ha ahaatee, laba ama sadexdii sano ee tegey gudahooodii dhowr qof oo dhalinyar iyo dad waawayn oo dalka u dhashay ayaa u dhintay cudurka kaneecada/ dhilmaanyada (Malaria), taasoo ay soo ridday kadib marka uu webigii fataha/butaaca daayey. Waaxda Caafimaadka ee Gobolku waxay inta badan sabab uga dhigeen dhimashadaas meelaha biyuhu istaagaan oo kaneecadu ay ka dhigato goob ay ku dilaacaan ugxanteedu ta yaryarina ay ka dhalato. Waxay dadkaasi ku taliyeen laba arrimood oo lagaga bixi karo dhibaatadan: ku wacyi gelinta/waxbarista waddaniyiinta khatarta arintaasi ay u leedahay, iyo baabiinta ilaha badan ee biyo joojinta leh wixii suurto gal noqda ka dib marka webigu uu butaaca dhimo.

Agaasime hay'ad bulshada ku dhisan oo dalka gudihiisa ah, ayaa isu diyaarisay inay ku dhaqa-aqdo barnaamij caafimaad oo ka hortag ah, kaasoo ku salaysan waxyaabihii ay heshay Waaxda Caafimaadku. Kolka la hayo waayo aragnimadii hore ee fataha wabiga, barnaamijku wuxuu u baahanayaa in lagu shaqeeyo muddo saddex bilood ah. Nasiib darro waxa noqotay, CBO-gu ma laha shaqaale joogto ah oo qaban kara culayska shaqo ee loo baahan yahay, laakiin hay'addu waxay hore ugu guulaysatay shaqa siinta mutadawaciinta. Agaasimihii waxay u dirtay afar xubnood oo shaqaalaheeda joogtada ah inay qoraal ahaan soo sameeyaan qorshe lagu qorto laguna diyaariyo labaatan xoog ku-deeqe ee ugu qiimo weyn (core) bulshada dhexdeeda, kuwaasoo taageero ka geysan kara fulinta barnaamijka caafimaadka ee ka hortagga ah. Xoog ku-deeqayaashaasu waxay u xilsaarnaanayaan, iyagoo ay hagayaan shaqaaluhu, inay hirgeliyaan barnaamij waxbarasho xil-liga roobka ka hor iyo inay diyaariyaan dadka meesha deggan isla marka biya fatahu uu joogsado si loo tirtiro ilaha biyuhu ay isku taagaan/biyo godanka leh.

1) Waxaad si kooban ula socodsiisaa ka qayb galayaasha xaaladda ay ku hawl geli doonaan (ta imika la idiin sheegay ama mid la mida) waxaanad tustaa inay ku shaqayn doonaan kooxo gudanaya kaalintii shaqaalaha CBO-ga. Ugu dul shaxee warqadda joornaalka hawlaha soo socda ee ay mas'uulka ka noqon doonaan gudashadooda xilliga tababarka inta ka hadhay.

    - Liis ka kooban hawlaha la qaban doono oo la soo saaro intaan la bilaabin shaqaalaynta mutadawiciinta,
    - Istaraatijiyad shaqo qoris oo ay ku jiraan su'aalo loo diyaariyey in la weydiiyo mutadawi-ciinta loo hanweyn yahay inta lagu guda jiro kulanka baadhista,
    - Qorshe ku lug leh tababarka iyo u diyaarinta ka faa'idaysiga mutadawiciinta, iyo
    - Qaabka kaantaroolida iyo qiimaynta ee raad gurka dhamaystirka iyo miisaamidda saamaynta uu yeesho barnaamijku.

2) Intaanad u kala jabin ka qaybgalayaasha kooxo ah afar ama shan qof, waxaad qabataa wada hadal hagan oo khuseeya hawlaha shaqa qoridda ka horreeya ee laga yaabo in loo baahdo. Tusaale, kuwaas waxa ku jiri kara lahaanshaha hadaf si cad u sharxan, tafaasiilo shaqo, istaraatijiyad waxqabad, qorshe ku saabsan kormeerid guud, fikrado ku lug leh sida loo aqoonsan doono mutadawiciinta ama erayo kale haddii aynu ku sheegno, jawaabaha laga bixin karo dhammaan su'aalaha mutadawiciinta loo hanweyn yahay ay soo jeedin karaan marka ay ku jiraan kulanka baadhitaan.

3) Kala sooc kooxihii hawsha, waxaanad siisaa waqti ah saacad si ay u unkaan qorshayaas-hooda shaqa qoridda ka horreeya, iyagoo ku dhisan sida ku muujisan talaabada 2. Dib u wac kooxaha waxaanad ka dalbataa inay warramaan. Waxaad u ogolaataa oo keliya inay su'aalaha kala caddeeyaan, warbixin kasta dabadeed. Warbixinuhu markay dhammaadaan ka dib, waxaad ka dalbataa iskudarka kooxda dhamaanteed inay ka faallootamaan dedaaladooda dhinaca farqiyada /waxay ku kala duwan yihiin, xoogagga, iyo goljilicyada. Waxaad u ogolaataa inay ku qaataan 30-45 daqiiqo kulankan warbixinta ah.

4) Waxaad ka codsataa kooxuhu inay galaan hawsha labaad, adigoo diyaarinaya istaraatijiyad shaqa qorineed oo la xidhiidha sida loo garto mutadawiciinta loo hanweyn yahay/ aad u muhiimka ah ee xulashada u danbaysa ee lagala soo baxayo kooxda labaatanka qof ah. Waxaad u baahanaysaa inaad u qabto / u haysato inay jiraan soo codsadayaal ka badan labaatan; haddii kale, hay'addu waxay la kulmaysaa shaqaale yaraan kaga dhaca mashruuca ama inay qaadato cid kasta oo xooggooda ku deeqda. Su'aalaha la weydiin karo qaarkood ee gogosha u xaadhi kara hawlahaas waxa ka mida kuwa hoos ku qoran:

- Sidee ayay kooxdiinu u soo qaban kartaa mutadawiciinta aad u muhiimka ah?
- Markaad garato xoog-ku deeqayaasha loo hanweyn yahay su'aalaha baadhitaanada iyo nidaamyada kale ee hufida ah oo noocee ah ayaad u isticmaali doontaa si aad xulashadii u dambaysay u samayso?
- Ma waxa kuu qorshaysan inaad shaqada qoratid qaar mutadawiciin ah oo kormeera kuwa kale mise inay qabtaan hawlo cayiman? Haddii ay sidaas tahay, sidee ayaad isu barbar dhigi kartaa tartamayaasha markaad go'aanadaas samaysid?
- Sidee ayaad u maarayn doontaa reebidda mutadawiciinta laga yaabo inaanad u baahnayn inay ka mid ahaadaan kooxdaada qiimaha leh?.
- Ma waxaad yeelan doontaa foomka codsiga shaqa qorista ee la yaqaan (standard application form)? Haddii ay sidaas tahay, maxaa loo baahanayaa geesta warka?

5) Waxaad siisaa koox walba qiyaastii saacad ay ku dhammeeyaan hawlahan, waxaanad raacdaa isla nidaamkii tallaabadii 3 ee warbixin dhegeysiga iyo faallo ka bixinta.

6) Waxaad isu keentaa labaddii hawlood ee u dambeeyey ee lagu tilmaamay tallaabada 1, waxaanad weydiisataa inay ka shaqeeyaan iyagoo kooxohoodii ku kala jira si ay u bogaan shaqa qoriddoodii xoog-ku deeqayaasha iyo barnaamijka diyaargarawga. Waxaad arrinkaas ku xigsiisaa warbixinaha iyo faallooyinka.

7) Mar haddii arrinkani ka dhigan yahay daymo weyn oo ah xagga hawsha shaqaalaynta iyo diyaarinta mutadawiciinta, waxa waxtar u noqon lahaa ka qaybgalayaasha in loo diro inay ka diyaariyaan qorshe waxqabad siday ugu dhaqmi doonaan wixii ay barteen ee khuseeya habka xoog-ku deeqayaasha loo shaqa qoro, loo tababaro, looguna meeleeyo hay'addooda. Qorshuhu waa inuu ahaado mid aad u cayiman oo tafaasiil laga heli karo:
   - Waa maxay tallaabooyinka loo baahan yahay in la qaado,
   - Yaa yeelan doona mas'uuliyadda hore ee qorshaynta iyo dhammaystirka tallaabo iyo waxqabad kasta,
   - Yaa kale oo ku lug yeelan kara gacansiinta fulinta tallaabo kasta
   - Jidwalada dhammaystirka iyo weliba wakhtiga loo baahan yahay in lagu qabto hawl walba (laba war oo kala geddisan)
   - Wixii alaabo gaar ah ee loo baahdo, iyo
   - Hab lagu kantaroolo harumarka natiijoyinkana lagu qiimeeyo.

Haddii aad haysid qof wax ka badan hay'addiiba, waxaad ka dalbataa inay isugu tagaan qorshaha waxqabad. Intaanad soo xidhin aqoon-isweydaarsiga, waxaad u dirtaa shakhsi kasta amase koox hay'adeed walba inay soo uririyaan qorshayaashooda. Waxaad ku soo afjartaa wada xaajood kooban oo khuseeya qiimaynta aqoon-isweydaarsiga.

# TUULKA 9:

## MAAMULIDDA WAXQABADKA SHAQAALAHA IYO MUTADAWICIINTA

Barashada miisaanka dhinacyada xidhiidh-hawleedka ee maamulka.

Ujeeddo Barasho: In lagu siyaadiyo aqoonta ka qayb galaha Hannaan Xaaladeedka Maamul iyo goorta si hawlkarnimo leh loo isticmaalo.

TUULKA 9:
MAAMULIDDA
WAXQABADKA
SHAQAALAHA IYO
MUTADA WICIINTA

Wakhtiga loo baahan yahay: Laba fadhi oo midkiiba qaadanayo wakhti ah laba saacadood iyo badh.

**Hawsha**

1. Waxaad qabataa wada hadal hagitaan leh oo ku tiirsan tusaalihii maamul ee Hersey Blanchard ee sida faahfaahsan laguugu siiyey jiska 4, “Waxqabadka Maamul” adiga oo hubinaya ka qayb galayaashu inay fahmeen afarta hannaan ee kala duwan iyo goorta lagu dhaqmi karo.
2. Kooxda waxaad u kala jebisaa cutubyo ka kooban saddex ama afar ka qayb gale. Ka qayb gale walba waxaad u dhiibtaa naqil ah qorshe-riwaayadeedka xaaladda, waxaanad fartaa inay ka jawaab celiyaan su’aalaha ku yaalla dhammaadka xaalad kasta. Waxay la gudboon tahay kooxda inay go’aansadaan sifaha ay u wada shaqaynayaan, si kastaba ha u dhacdee, waxaad rabtaa go’aano si wada jira loo gaadho xaalad kasta. Waa inay diyaar u ahaadaan inay dib isugu yimaaddaan nusa-saace gudaheed iyagoo go’aanadoodii wata, nooca hannaanka maamul ee ay u malaynayaan inay isticmaaleen, iyo waayo.

3. Intaanay cutubyadu dib isugu iman, astaan/miisaan xisaabeed (matrix) ku dheji gidaarka, adigoo ku muujinaya inay tirada xaalad kasta, afarta hannaan maamul ee kala doorashada leh iyo meelo bannaan oo aad ugu talagasho marba hanaanka la doorto in lagu qoro. Waxaad u dirtaa kooxaha inay ku qoraan warkooda la xidhiidha hannaanka miisaan-xisaabeedka. Waxaad kala hadashaa jawaabaha, adigoo awoodda saaraaya farqiyada u dhexeeya hannaanyaalka la isticmaalay ee ka jawaab-celinaya isla xaalad isku mid ah. Waxaad ku gunaanadaa fadhiga adigoo la wadaaga sida uu qoraagu u doorbiday hannaanka xaalad kasta iyo maxaa wacay. Warka noocaas ah ayaa lagu soo bandhigay bogga xiga siddeeda xaashadood ee qorshe riwaayadeedka. Iska hubi inaanad qaldamin oo aanad dhiibin xaashidan layligu uu ku yaallo.

## CARBISYO LOOGU TALAGALAY TUULKA 9: MAAMULIDDA WAXQABADKA SHAQAALAHA IYO MUTADAWICIINTA

LAYLIYADA HAWSHA:

Waxaad xilkiisa qabataa doorka kormeeraha – maamulaha ee mid kasta oo ka mid ah xaaladaha hawl la-xidhiidhka ah ee soo socda. Maxaa tallaabo ah ee aad ka qaadi lahayd xaaladdan? Hannaankee ayaa waxqabadkani uu masili karaa marka lagu saleeyo faahfaahinta hannaan kasta oo lagu muujiyay Jiska 4 ee Akhristaha? Waxaad hubisaa hannaanka la talantaaliga ah. Xaalad kasta, waxaad ka sheegtaa sababaha ka dambeeya tallaabadaada.

1. Kuwa ugu qiimo weyn mutadawiciintaada mid ka mida ayaa xiisa u haya inuu ka qayb qaato mashruuc cusub oo hadda loo xilsaaray CBO-gaaga ku dhow magaala weynta. Waxay caddaysay inay aad u karti badan tahay markay ka soo shaqaysay hawlo kale oo loo diray, ha yeeshee, may yeelan weli khibrad maamul mashruuc oo toos ah. Waxaad aaminsan tahay kartideeda, waxaanad u xilsaartay inay maamusho mashruuca cusub.

**Maxaa tallaabo ah ee aad qorshaysay inay qaaddo markay qabato mas'uuliyaddan cusub?**

______________________________________________________________________
______________________________________________________________________
______________________________________________________________________
______________________________________________________________________
______________________________________________________________________

**Hannaankee maamul ayuu yahay?**

Fare__________________ Tiiriye ______________ Hawlfududeeye __________________________

Awoodwakiishe______________________________________________________________________

Maxaad ugu malaynaysaa kani inuu yahay hannaanka maamul ee ugu habboon xaaladdan?

______________________________________________________________________
______________________________________________________________________
______________________________________________________________________
______________________________________________________________________
______________________________________________________________________

2. Koox ka mida kooxahaaga xoog-ku deegayaasha ah yaaa la shaqaynaysay waddaniyiin tirtirayey goobaha ay kaneecadu isku dhasho oo aan agagaarka meesha ay degganaayeen. Kooxdaasi hawshii way ku guulaysatay, waxaanay u ekayd mid aad u shaqa jecel. Kaaliyahaagii / ku – xigeenkaagii ka mas'uulka ahaa mashruuca ayaa dhowaan is-casilay si uu uga shaqeeyo NGO kale oo goobtaas degganaa.

**Maxaad yeeli doontaa?**

_______________________________________________
_______________________________________________
_______________________________________________
_______________________________________________
_______________________________________________

Hannaankee maamul ayuu arrinkani yahay?

Amarsiiye________________ Tiiriye ____________ Hawlfududeeye _________________________

Awoodwakiishe______________________________________________________________________

Maxaad ugu malaynaysaa inuu kani yahay hannaankii maamul ee ugu munaasibsanaa xaaladdan?

_______________________________________________
_______________________________________________
_______________________________________________
_______________________________________________

3. Kaaliyahaaga ayaad ka weyday inuu ku siiyo warbixin aad ka dalbatay inuu dhammeeyo muddo ka badan saddex toddobaad horteed. Caado ahaan wuu ku dhakhsan jirey hawlaha noocaas ah ee loo xilsaaro.

**Maxay jawaabtaadu noqonaysaa?**

_______________________________________________
_______________________________________________
_______________________________________________
_______________________________________________
_______________________________________________

**Hannaankee maamul ayuu arrinkani noqonayaa?**

Amarsiiye________________ Tiiriye ________________ Hawlfududeeye ____________________
Awoodwakiishe______________________________________________________________________

**Maxaad ugu malaynaysaa inuu kani yahay hannaankii maamul ee ugu munaasibsanaa xaaladdan?**

________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________

4. Mid ka mida maamulayaashaada mashruuca ayaa ka shaqaynayey meel aad u durugsn oo magaalaweynta ka mida, kaasoo u gutay hawlihii loo diray si aad u wacan. Si kastaba ha ahaatee, mid ka ka mida madaxda la soo doortay ee deegaankaas ayaa ku dheeraaday naqdiga mashruuca. Maamulahaagii mashruuca ayaa ku weydiistay inuu kaa arku naqdigan.

Maxaa qorshe ah ee aad u haysaa arrintan?

________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________

**Hannaankee maamul ayey arrintani gelaysaa?**

Amarsiiye________________ Tiiriye ________________ Hawlfududeeye ____________________

Awood wakiishe________________________________________________________________

**Maxaad ugu malaynaysaa inuu kani yahay hannaankii maamul ee ugu munaasibsanaa xaaladdan?**

________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________

5. Waxaad kala shaqaysaa guddi ka kooban waddaniyiin oo qorshaynaya mashruuc cusub oo khuseeya meel dakhli yari soo galo oo deegaanka ka mida. Waxaad tustay inay leeyihiin inay si buuxda u xil qaadaan qorshaha mashruuc iyo inaad ku qabto kalsooni buuxda kartidooda ay ku hirgelinayaan hawsha qorshaynta si ay guuli ku jirto. Waxaad isla wakhtigaas ka soo noqotay socdaal magaalada debeddeeda ah, waxaanad ka soo qayb gashay kulankoodii qorshaynta ee ugu dambeeyay oo saacad dib u dhacay. Markaad isa soo taagtay, waxaad dareentay inaan kulankiiba weli la isugu yeedhin.

**Maxaa qorshe ah ee aad dejinaysaa**?

______________________________________________________________________
______________________________________________________________________
______________________________________________________________________
______________________________________________________________________

**Hannaankee maamul ayuu arrinkani yahay?**

Amarsiiye _______________ Tiiriye ___________ Hawl fududeeye___________________________

Awood wakhiishe ____________________________________________________________________

**Maxaad ugu malaynaysaa inuu arrinkani yahay hannaanka maamul ee ugu munaasibsan xaaladdan?**

______________________________________________________________________
______________________________________________________________________
______________________________________________________________________
______________________________________________________________________

6. Ku-xigeenkaaga ayaa xiisa u haysa inay hagto barnaamij cusub oo ubadka dibjirrada ah ku lug leh, sidii kii hore ee ay kaga soo shaqaysay beesha kale. Haweenaydaasi waa mid aad qad-dariso go’aankeeda/qiyaasteeda maskaxeed iyo waaya-aragnimadeedaba, hayeeshee, waxa kale oo aad ogtahay inaanay lahayn wax khibrad kormeer ah oo toosa.

**Muxuu qorshahaagu yahay inaad yeesho?**

______________________________________________________________________
______________________________________________________________________
______________________________________________________________________
______________________________________________________________________

**Hannaankee maamul ayuu kani yahay?**

Fare _____________ Tiiriye __________________ Hawl fududeeye?__________________________

Awood wakiishe _____________________________________________________________________

**Maxaad ugu malaynaysaa inuu arrinkani yahay hannaanka maamul ee ku habboon xaaladdan?**

______________________________________________
______________________________________________
______________________________________________
______________________________________________

7. Waxaad isla imina soo gaadhay xarun xannaano maalmeed oo uu ka hawlgalo NGO-gaagu, waxaanay ishaadu ku dhacday in koodhkii/af garashadii nabadgelyada ee magaalaweynta lagu xadgudbay. Shaqaalihii waxay dhinaca saareen/hiil u noqdeen ubadkii iyo waalidiintii, hadafyadii barnaamijka xaruntana waa laga lalay/gudbay saddexdii bilood ee u dambeeyay. Si kastaba ha u dhacdee, waxa adiga kuu daran jebinta afgarashada (code violation) waayo, ma aha mushkilad cusub, waana mid keeni karta masiibo aan yarayn. Agaasimaha Xarunta waxa la xasu-usiyay arrintan booqashadeedii u dambaysay.
**Maxaa kula gudboon inaad yeesho?**

______________________________________________
______________________________________________
______________________________________________
______________________________________________

Hannaankee maamul ayaa arrinkani yahay?

Fare ______________ Tiiriye______________ Hawl fududeeye ______________________

Awood wakiishe ______________________________________________

**Maxaad ugu malaynaysaa kani inuu yahay hannaankii maamul ee ugu munaasibsanaa xaaladdan?**

______________________________________________
______________________________________________
______________________________________________
______________________________________________

8. CBO-gaaga ayaa adeegsaday dhallinyaro qalqaali/rabshoolayaal ah inay u fidiyaan adeegyo faya-dhowr (nadaafadeed) xaafadaha qaar. Iyadoo dhaqankani uu u keenay natiijooyin isku jira (samaan/xumaan) magaalaweynta oo dhan, haddana barnaamijkii laga fuliyay xaafadda Riverfront ayaa guul weyn soo hooyay. Dadkii deriska ahaa ayaa ka faalla bixiyay sida barnaamijkaasi uu karti u lahaa iyo sida ay kooxda rabshoolayaashu ugu nidar gashanaayeen inay xaafadda nadiif uga dhigaan. Si kastaba ha ahaatee, dadkii xaafadda deganaa qaarkood ayaa ku dacwooday inaanay cid shaqaalaha sare ah ka arag hay’adda oo shaqada la wada kooxda qalqaaliga ah.

**Maxaa qorshe ah ee aad gelaysaa?**

________________________________________
________________________________________
________________________________________
________________________________________

Hannaankee maamul ayuu arrinkani noqonayaa?

Amarsiiye ______________ Tiiriye ______________ Hawl fududeeye ________________________

Awooda wakhiishe ______________________________________________

**Maxaad ugu malaynaysaa inuu kani yahay hannaanka maamul ee ku habboonaa?**

________________________________________
________________________________________
________________________________________
________________________________________

# TUULKA 9 B

## ISTARAATIIJIYADAHA QORAAYADU AY DOORBIDEEN

**(Ku salaysan Tusaalaha Aragtiyeed ee Hersey-Blanchard)**

1. Xaaladdani waxay u baahan tahay hawlgelid "Amarsiiye". Iyadoo xoog ku-deeqadu ay ka soo shaqaysay mashaariic kale, haddana ma laha khibrad maamul oo toos ah. Ilaa iyo inta ay ka baranayso habka mashruuca loo maamulo, waxay u baahanaysaa faritaanka Agaasimaha.

2. Xaaladdan, waxaad haysaa koox soo guulaysatay, lehna tabihii iyo niyaddii amase shaqa jacaylkii ay ku gudan lahaayeen hawlaha ay kala shaqaynayaan waddaniyiinta. Qodobka kartida leh ee aan laga warqabin waxa weeye sida uu adayg iyo ahmiyad u lahaa doorka ku-xigeenku ee uu ku hoggaamin karayay kooxda. Waxaanu la jeclaysanay hannaanka hawl fududeeyaha xaaladdan: muujinaysa aaminimo, hubinaysa inay haystaan alaabtii ay u baahnaayeen, sida cad u garanaysa/ugu kala baxsan yihiin hadafyada, hayeeshee, aan ku tallaabsanayn kormeer toos ah. Haddii ay guushu u sii socoto si laxaad iyo dareenba (caadifad) leh, waxaanu u dhownahay in aanu si dhakhso leh ugu digarogano hannaanka maamul ee "awood wakiishe"

3. Waxay u egtahay inuu ku-xigeenku u baahan yahay taageero halka uu arrinku marayo. Maxaa ka horjoogsaday inuu dhammeeyo warbixinta? Ma la socdaa se sida ay warbixintu ahmiyad ugu leedahay adiga iyo hay'addaba? Waxa laga yaabaa inuu u baahday dib u quudin dhisan oo ku saabsan waxqabadkiisa ilaa iyo wakhtiga uu ku jirey warbixinta, ha yeeshee, uu ku dhiirran waayay inuu codsado. Waxa arrintaas inagaga filan hannaanka maamul ee "tiiriye".

4. Xaaladdan markaynu dhugano, maamulahaaga mashruucu si wacan ayuu wax u qabtay, siday runtu tahay aad u wacan. Uma baahna ku lug lahaansho hawl xidhiidh maamul leh halka uu wakhtigaas marayo, laakiin wuxuu isticmaali karaa waxoogay taageero xidhiidh ah (some relationship support). Waxa la moodaa meel lagu isticmaali karo hawlgal ah "hawl fududeeye" oo lagu maareeyo xaaladda.

5. Siddii xaaladdii hore, arrintani waxay u baahan tahay dabci/dhaqan " hawl fududayn" ah oo uu la yimaaddo maamuluhu. Kooxdu waa hawlkar, kalsoonidaadana way haystaan, ha yeeshee, waxyar oo dhiirri gelin ah ayey rabaan. Adigoo ku dhaqaaqa doorka "amarsiinta" xilligaas ay ku jiraan ayaa mas'uuliyadda adiga kugu soo wareejin karta, guddidana ka kaxayn karta.

6. Arrintani waxay u baahan tahay dabci "faritaan" oo ay la timaaddo maamuladdu ilaa iyo inta tabaheeda maamulida barnaamijka cusub iyo aqoonteeda goobta shaqadu ay u dhigmaan / soo gaadhaan nidar galkeeda iyo xiisaha gaar ahaaneed (enthusiasm)

7. Amuurtan waxaad mooddaa inay u baahan tahay hawlgelidda “tiirinta” leh, hawl sarraysa oo uu la socdo xidhiidh sarreeyaa waxaad isku daydaa inaad fahamto sababta loogu sii waday ku xadgudubka afgarashada (code violation), laakiin u sheeg waxa loo baahan yahay in la qabto si loo dhimo ku xadgudubka.

8. Hubaal, waxa halkan looga baahan yahay hannaanka “Awoodwakiishe”. Haddaba, farriintu waa inay gaadho bulshada in kooxda qalqaaliga ahi ay qabqablayaal iyagu ka yihiin mashruuca. Xaq ayey u yeesheen, waanay kasbadeen in mas’uuliyadda lagu wareejiyo.

## TUULKA 10

### HARUMARINTA KARTIDA AADMIGA EE MUTADAWICIINTA

**Ula jeedada Barasho:** In kor loogu qaado aqoonta iyo xirfadaha naqshad-dejinta wacyigelinta xoog-ku deeqayaasha iyo barnaamijyada tababar.

**Waqtiga loo baahan yahay: Qiyaastii saddex ilaa afar saacadood.**

Waxa laga yaabaa tababarka mutadawiciintu inuu kuugu jiro liiskaaga waxqabad halka ugu hoosaysa. Waxaanaanu u bogaynaa maqnaanshaha mudnaansiinta dhibaatooyinka halista ah ee NGO iyo CBO-yada ka horyimaadda maalin kasta. Haddaba, waxay nala tahay inay tahay maalgelin u qalanta lacagta ku baxda, maxaa yeelay, waxa laga yaabaa inaad hay'addaada ku hayso diiwaanka qofafka xoog ku-deeqayaasha ka mid ah ee xirfadaha u leh naqshad-dejinta iyo tebinta tababar. Waa halka ugu horraysa ee ay tahay inaad dhugato markaaad ku nidar gasho inaad tababar u qabato mutadawiciinta.

Ka dib markaad shaqaalaysid tababare aad kala dhex baxday saraakiisha mutadawiciinta, waxaad u dirtaa nashqad-dejinta barnaamij hanuunin ah oo fudud si loogu bisleeyo mutadawiciinta xidhiidh wax soo saar leh oo ay la yeeshaan hay'adda.

Waxa jira saddex qaybood oo warar ah oo muhiim u ah in lagu soo daro wargelinta tababarka.

1. Cidda aanu nahay, sababta aanu u uuman nahay/u jirno, cidda aanu u adeegno, iyo waxaanu qabano, ulajeeddooyinka jiritaankayaga.
2. Habka aanu u shaqayno, doorarka iyo xilalka mutadawiciinta, siyaasadda hay'adda iyo nidaamyada xoog-ku deeqayaashu ay u baahan yihiin inay ogaadaan, iyo wixii waxtar ah sida tababarka ee meel u yaal.
3. Sida xoog ku-deequhu uu u leeyahay jaraha (khiddadaha) hay'adda ee khuseeya Alaabooyinka/ashyaa'da, isbaritaanada soo dhoweynta ay u yeeshaan hoggaaminta iyo shaqaaluhu, iyo meelaha lagu raaxaysto ee bulshada ku xidhan.

Marka laga gudbo warsiinta, waxa jirta baahida loo qabo in la dhiso kartida mutadawiciinta ee la gashay nidarka muddada dheer hay'adda. Maxaa aqoon ah, xirfado, dabeecado, amase hawlgelitaano ayey mutadawiciintu u baahan yihiin si ay firfircooni ugu qabtaan doorarkooda? Marka harumarinta kartida aadamigu ay ka maqan tahay maamulidda kartida aadamiga, maamulka kartida aadamuhu wuxuu noqdaa/kama dhaco Ijiinka baabuutka oo ay ku jiraan balaagyada dabka dhaliya oo wasakhaystay/xumaaday (fouled spark plugs).

Fikradahani waxa kale oo ay anfacayaan baahiyaha wargelinta iyo tababarka shaqaalaha joogtada ah.

### Hawsha

Waxa jira habab door ah oo aad ugu soo kordhin karto HKA barnaamijkaaga tababar. Waxaanu doorbidaynaa inaanu arrintaas ka dhigno mid diyaar ah (hands on), mid muuqata intii suurtagal ah aanu uga dhigno macaamiishiina NGO iyo CBO ahaan. Haddii intooda badani aanay lahayn

barnaamij wargelin ah oo ku filan, waxaynu ka bilaabaynaa kan. Haddii ay leeyihiinse, waxaad u dirtaa ka qayb galayaasha inay ku dhaqaaqaan qiimayn ah baahiyaha tababar oo ay ku lug lahaadaan mutadawiciinta iyo shaqaalaha, si ay u soo saaraan waxa ay yihiin baahiyaha tababarka mutadawiciintа kuwa ugu sii daran. Hawshan soo socotaa waxay xoogga saaraysaa tababarka wargelinta.

1. Waxaad ka dalbataa ka qayb gelayaasha intaan la bilaabin aqoon-isweydaarsiga inay ku dhaqaaqaan qiimayn fudud oo ah baahiyaha tababar iyagoo aan ka leexanaynin arrinka wargelinta xoog-ku deeqayaasha. Waxaad u gudbisaa weydiimo leh meelo la buuxiyo (a short quesitionare) oo kooban kaasoo khuseeya waxa ilaa hadda la qabtay ee lagu warsiiyey xoog-ku deeqayaasha iyo waxyaalaha dhiman ee ay tahay in la qabto, sida ay u arkaan mutadawiciinta, hoggaamiyeyaasha hay'adda iyo shaqaalaha.

2. Waxaad ku bilawdaa aqoon-isweydaarsiga wadaxaajood hagan oo kooban kuna saabsan wareegga dhacdooyinka tababar. Fikradaha waxaad ka eegtaa Jiska 5: Qaybta1

3. Waxaad ka dalbataa ka qayb galayaasha inay warbixin kooban ka sameeyaan wixii ay arkeen hawsha aqoon-iswaydaarsiga ka hor. Warka waxaad ku sajishaa xaashida joornaalka ama sabbuurad cad (white board) warbixinta lagu siiyaba. Marka warbixinaha oo dhan la sheego, kooxda waxaad u dirtaa inay soo ururiyaan kuna sajilaan xaashiyaha cad ee joornaalka waxyaabaha ay u arkaan inay iskaga mid yihiin QBT-tooda. Waxa kale oo aad sajishaa waxyaalaha ay ku kala duwan yihiin. Adigoo ku salaynaya nooca warka la ururiyey la isuna keenay, waxaad ka codsataa ka qayb -galayaasha inay gaadhaan ra'yi ay u wada jiraan oo ay u malaynayaan inuu noqon karo qoraalka aasaasiga ah ee looga baahan yahay warsiinta dhacdada tababar iyo habaynta sida loo kala harmarinayo.

4. Iminka oo ay ka qayb galayaashu isku raaceen aasaaska wargelinta oo ku tiirsan waayaaragnimadooda wadajir iyo wararka ay ka heleen hay'adahooda, waxaad weydiisataa inay gaar gaar ama saaxiibadooda ay isku hay'adda yihiin kala shaqeeyaan qoraal faahfaahsan oo ku lug leh barnaamijka warsiinta oo ay ugu talagalaan hay'addooda. Waxaad siisaa qiyaastii saacad ay kaga shaqeeyaan layligan, waxaanad ka dalbataa inay ku qoraan faahfaahintaas waraaqaha joornaalka si ay u wadaagaan.

5. Dib isugu yeedh ka qayb galayaasha, waxaanad hubisaa wakiilada hay'ad kastaa inay soo bandhigaan waxa u qorshaysan inay qabtaan si ay u gebagabeeyaan barnaamijka wargelinta, waxaanad ka dhigtaa qayb joogta ah oo ka mida barnaamijkooda maamul ee mutadawiciinta.

# TUULKA 11

## QIIMAYNTA WAXQABADKA SHAQAALAHA

Waa goobaha MKA mid ka mid ah ee u qalanta buug dhan oo faritaan ah. Mar haddii aanu u hayno bannaan yar oo cidhiidhi ah oo aanu awoodda ku saarno mas'uuliyaddan muhiimka ah ee haddana inta badan meel lagaga dhaco ee ay leedahay maamulidda kartida aadamaha, waxaanu doonaynaa inaanu yara jalleecno qiimaynta waxqabadka, siday u arkaan ka qayb galayaasha muhiimka ah, kormeeraha iyo qofka shaqaalaha ah. Maxay tahay inay yeelaan si ay ugu diyaar garoobaan dhacdadan muhiimka ah, ama waxa dadka qaarkii ay uga cabsoodaan sida gurxanka iyo dhaqdhaqaaqa ka yimaadda dhiig iska shubka sannadkii mar dhaca? Waxaanu mari doonaa labadaas aragtiyood annagoo soo jeedinayna wadhadal hagan oo la xidhidha diyaar noqoshada maamulaha iyo hawl kulan baadhitaan oo dhex mara maamulaha iyo qofka shaqaalaha ah oo ku salaysan su'aalaha qaar oo shaqaaluhu ay isweydiin karaan si ay ugu diyaar garoobaan qiimaynta waxqabad.

**Ulajeeddada barasho:** In lagu kordhiyo aqoonta iyo xirfadaha ka qayb galayaasha xagga hawsha qiimaynta waxqabadka shaqaalaha.

**Wakhtiga Loo baahan yahay:** Qiyaastii saddex saacadood oo leh nasasho cabbitaan iyo cunto la isa siinayo.
Hawsha

1. Waxaad ku furtaa aqoon-isweydaarsiga khudbad-wadaxaajood hagan oo ku saabsan waxa uu qaban karo maamulaha ama kormeeruhu ee uu ugu diyaar noqon karo shirka qiimaynta waxqabadka ee lala yeelanayo qofka shaqaalaha ah. Sida kale ee looga wareegi karo, waxaad qaban qaabisaa layli maskasxada daaliya si aad uga soo ururiso war ka qayb galayaasha iyagoo ku salaynaya waaya-ragnimadooda.

**Waxa hoos ku muujisan qaar ka mid ah hawlaha u diyaargarawga ee muhiimka ah ee maamulayaasha iyo kormeerayaashu ay leeyihiin inay tixgeliyaan si ay ugu diyaargaroobaan fadhiga qiimaynta waxqabad.**

- **Waxaad dib u jalleecdaa baahiyaha shaqo iyo wixii heerar ah ee hay'addu ay u qabatay qiimayn waxqabad ahaan ee khuseeya shaqada gaar ee qofka shaqaalaha ahi uu gudanayo.**
- **Isku day inaad soo xasuusato (refresh your memory) taariikhdii shaqo ee qofka shaqaalaha ah. (Halkaas marka la marayo, dadka qoraalada kooban ka samaynaya waxqabadka qofka shaqaalaha ah ee ku kordhinaya galkiisa ayaa dareensanaanaya inay hawshoodii si gaar ah uga soo baxeen).**
- **Waxaad dib u dhugataa hadafyada iyo heerarka la qabtay shirkii qiimaynta ee ugu dambeeyey. Waxaad qoraallo ka samaysaa xagga aragtida maamulaha sida arrimahaas loo gaadhay.**
- **Waxaad eegtaa/u fiira yeelataa hawlaha gaarka ah ee loo xilsaaray ama mas'uuliyadaha ee qofka shaqaaluhu uu gutay sannadka gudihiisa iyo weliba kartidiisa/deeda ee uu si firfircoon ugu shaqeeyey isagoo xubin ka ah kooxda shaqo.**
- **Si aan rasmi ahayn, u raadi aaraa'da dadka kale ee uu qofku dhexgal la leeyahay shaqada inta uu joogo, kuwaasoo ka kooban saaxiibadiisa, macaamiisha iyo mutadawiciinta.**

- **Rog-rog suurtagalnimada majaraha/khadka shaqo ee muddada dheer ama ku koobnaanta hay'adda (Limitations with the organization). Waxa muhiim ah in aad awood u leedahay inaad hoos u eegto jidka shaqo ee uu qofka shaqaalaha ahi marayo oo aad la timaadid qiimayn xaq ah oo ku lug leh mustaqbalkiisa/keeda dhinaca hay'adda.**

2. Waxaad fartaa ka qayb galayaasha inay ku hawlgeli doonaan lamaanayaal (in pairs) muddo saacad ah, iyaga oo kulamo baadhitaan dhexdooda ka samaynaya kuna salaynaya sedhadh su'aalo ah oo shaqaalaha dhamaantood ay tahay inay gudahooda iska weydiiyaan, intaanay fadhi la yeelan kormeerahooda oo ku saabsan shirka qiimaynta waxqabad. dhinaca kale ee looga waregi karaa arrintan waxa weeyi iyadoo halka laba-labada loo kulmayo laga dhigo saddex- saddex qof, taasoo qof sadexda ka mid ah uu daawado sida uu kulanka baadhitaanku u dhacayo dib u quudina ka bixiyo. Arrintani waxay qaadanaysaa wakhti intii loogu talagalay ka yar badan, mar haddii saddexda ka qayb gale ay doorarkii oo dhan ka qaadanayaan inta layligu uu socdo: qofka la baadhayo, kulan baadhe, iyo daawade. Si kastaba ha u dhacee, wuxuu dhammaantood u noqonayaa waaya-aragnimo barasho oo murti xambaarsan. **Waxa muhiim ah kulamo baadhitaanadan oo kale in lagu dhaqmo war iyo khibrado run ah oo ay leeyihiin dadka baadhitaanku uu khuseeyo.**

3. Waxaad u diyaarisaa ka qayb gale kasta su'aalo suurtagal ah oo ay u isticmaali karaan qabashada kulanka baadhitaan. (Su'aalahan bogga kan xiga ku yaal oo loo habeeyey/loo dhigay si loo sawiran karo, waxa dardar cusub geliyay buugga Robert Maddux, "Qiimayno Waxqabad oo Firfircoon", Crisp Publications, Menlo Park, California, 2000, PP 35-6). Waxaad ka dalbataa ka qayb galayaasha oo dhan inay dib u eegaan su'aalaha, kana fakiraan habka ay dib isugu habayn karaan, qaarna uga saari karaan qaar kalena ugu kordhin karaan, erayada su'aalahana ay qaar kale ugu beddeli karaan si ay baahiyahooda ula keeni karaan iyagoo masilaya kormeeraha kulanka baadhitaan qabanaya. Dhul bannaan ayaa loogu tala galay carbiska ku yaalla bogga soo socda si loogu qoro su;aalaha dheeraadka ah, su'aaluhuna ma lanbarsana. Lambaradu had iyo jeer waxay ina tusaan siday arrimuhu isu-xig xigaan xitaa haddii aan loola jeedin.

**TUULKA 11**
**QIIMAYNTA WAXQABADKA SHAQAALAHA**

4. Waxaad u sheegtaa qodobada wacan ee waxtarka u leh kulanka baadhitaanka waxaanad ka fiirsataa inaad weydiisato laba xoog –ku deeqe inay qabtaan kulan baadhitaan kooban bandhig ahaan. Ka faallootan jilidda doorka intaanay kooxuhu samaysmin oo aanay kala bixin. Waxaad ka codsataa inay qiyaastii saacad gudaheed ku soo noqdaan si ay u galaan wada hadalkii u dambeeyey.

Dib isugu yeedh ka qayb galayaasha waxaanad kala hadashaa carbiska geesta waxtarkiisa, ahamiyadda ay leedahay isticmaalka waaya-argnimada hab loogu diyaariyo shaqaalaha fadhigooda qiimaynta sannadeed, iyo waxyaalaha lama filaanka /soo booddada ku noqday intii ay ku guda jireen kulamada baadhitaan.

## DOOKUMANTI LOOGU TALAGALAY TUULKA 11: QIIMAYNTA WAXQABADKA SHAQAALAHA

Su'aalahan soo socdaa waa qaar shaqaalaha dhammaantood ay tahay inay isweydiiyaan min wakhti ilaa wakhti kuna saabsan waxqabadkooda shaqo ee wakhtiga xaadirka ah iyo rajadooda weyn ee mustaqbalka. Waxay noqon karaan qaar si gaar ah waxtar ugu yeesha shaqaalaha oo ay ugu diyaargaroobaan, qiimayn sannadeedkooda waxqabad iyagoo la kaashanaya kormeerahooda. Qaabka su'aalaha is beddel ayaa lagu sameeyey si loogu muujiyo wadahadalka dhexmara kormeeraha iyo qofka shaqaalaha ah. Haddii aad masilayso/dheelayso doorka kormeeraha ha is odhan su'aalaha u raac sida loogu dhawaaqay, ama u sheeg siday u qormayaan. Ka faa'iidayso kulanka baadhitaan adigoo waxna ku daraya, waxna ka jaraya, ama wax ka beddelaya su'aalaha, ee ku gudajira wadaxaajoodka aad la leedahay qofka shaqaalaha ah. Dhul bannaan ayaa loo qoondeeyey inaad ku xarriiqdo wixii qoraal ah ee aad rabto inaad samayso weydiin walba dabadeed.

Waxaad kulanka baadhitaan ku furtaa qiraallo shakhsi ah iyo danta laga leeyahay wadahadalka. Sida laga hayo Rollin Glaser, "Si habboon u noqo qof bulshay ah".

Weydiimaha tixgelinta leh:

- **Waxaad i xasuusisaa mar kale, adigoo erayadaada isticmaalaya, waxaad u aragto inay yihiin hawlaha ugu muhiimsan ee aad fuliso ee qayb ka ah shaqada aad noo hayso.**

______________________________
______________________________
______________________________

- **Sidee ayaad u malaynaysaa inaad u gudan doonto hawlahan?**

______________________________
______________________________
______________________________

- **Maxaad ugu jeceshahay shaqadaada?**

______________________________
______________________________
______________________________

- **Maxaad ugu jacayl yartahay shaqadaada?**

______________________________
______________________________
______________________________

- **Ma jiraan arrimo shaqadaada ku saabsan oo aad rabto in wax laga beddelo?**

- **Markii aynu haynay wadahadalkan oo kale sannadkii tegey, waxaynu isku raacnay hadafyo iyo heerar waxqabad oo shaqada la xidhiidha. Sidee ayaad u malaynaysaa inaad wax u qabatay si loo gaadho/loogu guulaysto hadafyadaas iyo heerarkaas sannadkii ina dhaafay?**

- **Marmarka qaarkood kormeere ahaan, lama socdo had iyo goor waxa ku wareegaya nolosha shaqaalaha, xagga shaqada gudaheedana ha ahaatee. Ma ii sheegi kartaa wax xil gudasha ah oo cayiman oo aad gaadhay sannadkii ina dhaafay, haddii ay tahay shaqada gudaheeda iyo haddii ay tahay wakhtiyada aad ka maqan tahay hay'adda, oo aad u bogtay?**

- **Maxaan qaban karaa kormeere ahaan ee aan kugu caawin karaa si aad xilgudasho tii hore ka wacan u yeelato?**

- **Miyey jirtaa wax hay'addu qabato, ama anigu qof ahaan aan qabto oo kaa hakisa/kaa hortaagan inaad noqoto qof sidii hore ka firfircoon geesta shaqada?**

- **Miyey jirtaa khibrad ama tababar shaqada la xidhiidha oo aad rumaysan tahay inay kaa taageeri lahayd xilgudasho tii hore ka fiican?**

- **Maxaad doonaysaa inaad qabato shan sano oo iminka laga bilaabo?**

________________________________________
________________________________________
________________________________________

- **Arrinkani waxtar ayuu ii yeeshay. Iminkana, waxaan rabaa inaan ka hadlo hadafyada qaar iyo heerar shaqo oo loogu talagalo sannadka soo socda oo ku salaysan wada xaajoodkeena. Markaynu dhugano kuwii aynu isu raacnay sannadkii tegey, miyey jiraan qaar u baahan in wax lagu kordhiyo amase wax laga dhimo/ laga saaro adiga aragtidaada?**

________________________________________
________________________________________
________________________________________

- **Maxay yihiin hadafyada cusub ama heerarka waxqabad ee aad rabto inaad tiigsato sannadka foodda inagu soo haya?**

________________________________________
________________________________________
________________________________________

- **Miyey jiraan waxyaale kale oo aad rabto inaad ka hadasho kuna saabsan waaya-aragnimada hay'adda gudaheeda ee sannadkii ina dhaafay ama sannadka inagu soo aaddan oo kaaga dhigi kara waaya-aragnima shaqo oo ka wacan tii hore?**

________________________________________
________________________________________
________________________________________

- **Su'aalahaaga:**

________________________________________
________________________________________
________________________________________

Heerkaas marka uu marayo wadaxaajoodku, waxaad u baahan doontaa inaad mar kale sheegto garashadaada ku lug leh qodobada muhiimka ah iyo nidargalka labada dhinacba ee loogu talagalay inuu hore u dhigo waxqabadka iyo wax ku darsiga shaqaalaha. Iyo inaad ku soo afjarto wadahadalka mahadsanidin diirran iyo wax allaale wixii kale ee munaasib aad u aragto.

# TUULKA 12

## SHAQA JECLAYSIINTA SHAQAALAHA

Ujeeddada barasho: In hore loo mariyo garashada ka qaybgalayaasha xagga hababka shaqada loo jeclaysiinayo shaqaalaha.

Waqtiga loo baahanyahay: Qiyaastii laba saacadood.

**Hawsha**

1. Waxaad ka dalbataa ka qayb galayaashu inay dhammaystiraan weydiimaha astaamaynta leh (questionnaire) ee khuseeya is qiimahaynta ee lagu muujiyey bogga soo socda, "Raadinta Istaraatiijiyadaha Shaqa Jeclaysiinta ee Hay'addaada". Waxaad xasuusisaa, haddii ay akhristeen buugga fartiaanka, in qodobada qaarkood ay ka geddisan yihiin kuwii lagu soo qaaday Qaybta 1 ee buugga. Intaanay bilaabin dhammaystirka weydiimaha, waxaad su'aashaa in cidi ay u baahantahay caddayn/bayaamin ku lug leh hawlgalka weydiimaha.
2. Markay dhammeeyaan astaamaynta weydiimaha, waxaad ka dalbataa inay ku hawlgalaan kooxo yaryar oo middiiba ay tahay 5 – 7 ka qaybgale oo ay kaga wadaxaajoodaan dhibcaha ay keenaan una xisaabiyaan dhibicda hoosaysa ee jawaab celinta kooxdooda khusaysa ee su'aal kasta. Waxa kale oo ay leeyihiin inay sameeyaan soo-ururinta shaqa jeclaysiiyayaalka ay la noqotay inay aad muhiim ugu yihiin jawigooda shaqo haddii ay helaan shaqaalahoodu.

   Intaanad dib isugu yeedhin, waxaad fartaa koox walba inay u diyaargarowdo inay ka warbixiso dhibcaha ay keento iyo soo-ururinta shaqajeclaysiiyayaalka. Intay kooxaha yaryar shaqaynayaan, waxaad diyaarisaa sawir (chart) aad ku dul samayso waraaqda joornaala kana yara kooban, halkaas oo koox kastaa ay ku sajili karto jawaabteeda.

3. Dib isugu yeedh kooxaha shaqo, waxaanad ka dalbataa inay ku sajilaan jawaabahooda la xidhiidha hawlaha ay hirgeliyeen kooxohooda shaqo.
4. Waxaad ku gunaanaddaa hadal ku saabsan tallaabooyinka hay'adahoodu ay qaadi karaan ee kordhin kara shaqajeclaysiinta shaqaalaha.

TUULKA 12
SHAQA-JECLAYSIINTA
SHAQAALAHA

**RAADINTA ISTARAATIIJIYADAHA SHAQAJECLAYSIINTA EE HAY'ADDAADA**
**(Su'aalaha Is qiimaynta iyo Waraaqaha Shaqo ee Tuulka 12)**

Hoos waxa ku liisgaraysan istaraatiijiyado door ah oo hay'adaha kale ay u arkaan inay muhiim u yihiin shaqajeclaysiinta cududahooda shaqo. Markay istaraatiijiyad kastaa leedahay miisaan ah (qiime) shan dhibcood si aad u sajisho intaad rumaysan tahay inay gaadhsiisan tahay hay'addaadu intay ku deeqdo/bixiso fursado shaqajeclaysiin ah. Waxaad goobo gelisaa tirade aad ictiqaadsan tahay inay si run ah u tilmaamayso jawiga/xaaladda shaqajeclaysiineed ee hay'addaada.

1. Ma laha
2. Dhif ayey leedahay
3. Marmar
4. Inta badan waqtiyada
5. Had iyo goor

Markaad dhammayso dhibco u samaynta qodobadan, waxaad gelisaa astaan-hubineed xerada dhinaca midig ugu xigta sawirka, adigoo muujinaya 3 – 4ta istaraatiijiyado ee aad rumaysantahay hay'addaadu inay ku shaqayso si ay u kordhiso shaqajeclaysiinta shaqaalaha.

| Istaraatiijiyadaha Shaqajeclaysiinta Sida Loogu Dhaqmo Hay'addaada | Qiimaynta | Mudnaanta |
|---|---|---|
| 1. Hay'addayada waxa loo yaqaan meel saaxiibtinimo leh xagga shaqada. | 1 2 3 4 5 | |
| 2. Shaqaalahayagu waxay dareen-sanyihiin inay qabtaan wax weyn oo muhiim ah. | 1 2 3 4 5 | |
| 3. Shaqaalaha dhammaantood waxay leeyihiin fursado ay qorshe ku dejiyaan go'aanana ka gaadhaan arrimaha saa-maynta ku leh. | 1 2 3 4 5 | |
| 4. Shaqaalaha oo dhan waxa la siiyaa fursado ay ku soo saaraan shaqo taya leh. | 1 2 3 4 5 | |
| 5. Inta badan, shaqaalahayaga dhammaantood si fiican ayey u wada dhaqmaan. | 1 2 3 4 5 | |
| 6. Shaqaalah dhammaantood waxay haystaan fursado ay ku fuliyaan shaqo xiisa leh iyo mid niib leh intaba | 1 2 3 4 5 | |
| 7. Shaqaalaha waxa lala socod-siiyaa wax allaale waxa ka dhacaya hay'adda gudaheeda. | 1 2 3 4 5 | |
| 8. Shaqaaluhu waxay qabaan in shaqooyinkoodu ay muhiim u yihiin guusha hay'adda. | 1 2 3 4 5 | |
| 9. Shaqaalaha waxa la siiyaa fursado ay wax ku abuuraan oo shaqada ah. | 1 2 3 4 5 | |
| 10. Shaqaalaha waxa lagu aqoon-sadaa waxqabadka fiican. | 1 2 3 4 5 | |
| 11. Shaqaaluhu waxay awoodaan inay go'aano ka sameeyaan wixii wax ka beddelaya waxqa-badkooda shaqo. | 1 2 3 4 5 | |

| | | |
|---|---|---|
| 12. Dhammaan shaqaaluhu waxay fahamsan yihiin ulajeeddada iyo hadafyada hay'adda.<br>13. Dhammaan shaqaaluhu way raacsan yihiin ulajeeddada iyo hadafyada hay'adda.<br>14. shaqaalaha waxa la siiyaa awood ay ku fuliyaan mas'uuliyadaha shaqadooda.<br>15. Shaqaaluhu waxay hay-staan fursado ay harumar shakhsi iyo mid shaqoba ay ku helaan. | 1 2 3 4 5<br>1 2 3 4 5<br>1 2 3 4 5<br>1 2 3 4 5 | |

**Hawlaha Dhibco-Keenidda iyo Qorshaynta**. Isugee dhammaan dhibcahaaga, waxaanad ku qor-taa bannaanada soo socda: ______________________________

Haddii aan keentay 60 dhibcood ama ka badan xagga waraysigan yaree la xidhiidha shaqajeclay-siinta shaqaalahaaga, waanu kugu hambalyaynaynaa. Halkee ayeynu ka soo qabanaa foomkii codsiga shaqa qoridda?

Haddii isugeynta dhibcahaagu ay u dhaxayso 40 iyo 60, si wacan ayaad hawshaas u waddaa, ha yeeshee waxa laga yaabaa shaqaalahaagu inaanay ku hadaaqayn/ku riyaaqayn in meesha ay ka shaqeeyaan ay meel aad u fiican tahay.

Haddii iskudarka dhibcahaagu ay hoosmarto 40, waxaad u dhowdahay inaad u baahantahay inaad albaabka laga soo gelayo xidhato, haddii aad baahi run ah u qabto shaqaalahaas.

Si kastaba ha ahaatee, waxaad liis ka samaysaa istaraatiijiyadahaas shaqajeclaysiinta loogu talaga-lay ee aad rumaysantahay hay'addaadu inay u baahantahay inay ku shaqayso mustaqbalka dhow si ay hore ugu mariso jawiga shaqajeclaysiinta shaqada. Markaad xagga hoose ku taxdo, waxaad raacdaysaa 2 – 3 tallaabo oo la qaadi karo si loogu fuliyo istaraatiijiyadahan:

**Mudnaanta 1:**

______________________________

**Tallaabooyinka la soo-jeediyey in la qabto:**

______________________________
______________________________
______________________________

**Mudnaanta 2:**

______________________________________________

**Tallaabooyinka la soo-jeediyey in la qabto:**

______________________________________________
______________________________________________
______________________________________________

**Mudnaant 3:**

______________________________________________

**Tallaabooyinka la soo-jeediyey in la qabto:**

______________________________________________
______________________________________________
______________________________________________

**Waxaad ku sajishaa bannaanka hoos ka muuqda istaraatiijiyado kale oo aad is leedahay hay'addaadu ha u fiira yeelato si ay u kordhiso shaqaje claysiinta qofka shaqaalaha ah:**

______________________________________________
______________________________________________
______________________________________________

Ugu dambayntii, haddii aad tahay maamulaha amase kormeeraha hay'addaada, waxaad tixgelisaa inaad u dirto shaqaalahaaga dhammaystirka su'aalaha astaamamaynta leh, dabadeedna kala xaajood adigoo uga jeeda in wax run ah la qabto si hore loogu mariyo shaqajeclaysiinta iyo nidargelidda hay'addaada.

# TUULKA 13

## MAARAYNTA WAXQABADKA AAN LAGA RAALLI AHAYN

**Ulajeeddada barasho:** In la kordhiyo aqoonta iyo xirfadaha ka qaybgalaha xagga maaraynta waxqabadka aan laga raalli ahayn ee qofka shaqaalaha.

Waqtiga loo baahanyahay: Qiyaastii saddex saacadood.

**Hawsha**

Carbiskan waxa ka mid ah saddex wareeg oo kulan baadhitaan ah si ka qaybgale kastaa uu u helo fursad uu ku guto doorarka maamule, shaqaale, iyo daawade.

TALABIXIN SOCDAAL

1. U kala saar ka qayb galayaasha saddex kooxood. Koox walba waxaad u dirtaa inay iska soo dhex qabtaan cidda noqonaysa maamule, shaqaale iyo daawade wareegga hore.
2. Waxaad fartaa siday u hirgeliyaan jilidda doorka haddii aanay hore u soo marin
3. Waxaad gacanta ka gelisaa tafaasiisha doorka iyo faritaanada daawadayaasha.
4. Adigoo ku bilaabaya faallooyinka daawadayaasha, waxaad ka dalbataa inay ka wadahadlaan jilidda door kasta intaan loo gudbin wareegga xiga. Waxaad kala hadashaa qaybtii ugu adkayd dib u eegiddii jilidda\masilaadda.
5. Markay dhammaan saddexda xubnood ee kooxaha yaryari helaan fursad ay ku jilaan door kasta dib isugu yeedh dhammaan kooxda, waxaanad kala xaajootaa carbiska iyo casharada ugu muhiimsan ee ay ka korodhsadeen waaya-aragnimada.

Laba xaaladood oo jilid door ah oo qudha ayaa ku jira faritaanada soo socda inkastoo carbisku uu u baahanyahay jilid door saddexaad oo la qabto, taasoo aan ahayn ilduuf. Waxaanu rumaysanahay jilidda doorarka ee ugu fiican in laga helo waaya-aragnimada nolosha runta ah ee ka qayb galayaasha. Waxaad weydiisataa koox (triad) kasta inay sharaxdo dhibaato waxqabad uu isagu/iyadu soo martay oo ay u isticmaali karto jilidda doorka saddexaad.
Haddii ay fikraddaas ka doorbidaan doorarka la siiyey, waa arrin fiican! Xaaladdu markay sidaas tahay, mid kasta waxaad ka dalbataa inuu la yimaaddo mushkilad waxqabad oo ay u isticmaali karaan gaadhitaanka xitaa barasho taasna ka sii weyn.

Waxaanu door jilayaasha u bixinaynaa magacyo, waayo, waxay nala tahay inay muhiim tahay in wadahadaladaas laga dhigo shakhsiyo. Fadlan, magacyadan waxaad u beddeshaa kuwo la mida oo can ah dalkaaga iyo dhaqankaaga waafaqsan.

**Jilidda Doorka 1:**
**Doorka Maamulaha:**

Faarax wuxu ka shaqaynayey qolka alaabtu taallo ee NGO-gaaga qiyaastii saddex sano waxaanu intaaba ku shaqaynayey heerka ka hooseeya filitaankaaga. Waxaad rumaysan tahay in Faarax uu yahay dadka ku xejista shaqadooda inay ku socdaan majare u dhexeeya “ aad u diiranow dabna ha shidin”. Waxaad dhowr jeer kala hadashay shaqajacayl la’aantiisa iyo xiisa la’aantiisa, laakiin

waxba Alle kama tarin. Markii ugu dambaysay ee aad kulanteen ee aad ka wahadsheen dabeecad-diisa, waxaad ku heshiiseen hadafyo cayiman inuu Faarax gaadho lixda bilood ee ka dambeeya kulnkaas gudahooda, hadafyadaasoo ah:

- Inuu alaabta hangarka/bakhaarka taalla dhammaanteed tiriyo lana keeno tirada hadhaaga ee kaadhadhka ku qoran;
- Inuu liis ka sameeyo alaabta aan wax faa'iido ah iminka lahayn ama waqtigeedu uu dhacay;
- Inuu gidaar ka taago/ka dhiso qolka alaabtu taal iyo mafrishka ay shaqaalaha kale alaabta ka qaataan kala badha.

Waxa kasoo wareegay 45 maalmood markii adiga iyo qofka shaqaalaha ah aad ka wadaxaajoo-teen hadafyadaas, manaad arag wax daliil/burhaan ah oo muujinaya in hadafyadaas lagu socday. Daliil muuqda, iyo warbixino harumarineed midna ma jiro! Waxaad ka dalbataa inuu xafiiskaaga u yimaaddo kulan kale oo dib u eegid ah.

TUULKA 13:
MAARAYNTA
WAXQABADKA
AAN LAGA RAALLI AHAYN

**Jilidda doorka 1**
**Doorka qofka shaqaalaha**

Waxaad u shaqaynaysay Xaawa saddex sano ku dhowaad, muddadaasoo dhana dhibaato aan yarayn ayey kugu haysay oo xagga shaqada ah. Waxaad aakhirkii isugu deysatay inaanay ku jeclay/ku rabin. Haweenaydaadii ayaa ku tidhi, "waar dumarnimada ayaa ugu wacan". Hayeeshee, maad hubsan dhibaatadu halka ay ka imanayso. Waxaad in aad ah ka shaqaynaysay qolka istoodhka ah markii cid waliba diidday inay ka shaqayso. Waxa kale oo jirta ah inay tahay hawl aan ku xiisagelinayn. Horena ugamaad soo shaqayn meel istoodh, Xaawina halkaas ayey kula baratay/barriinsatay iyadoo aan wax tababar ah ku siin, arrinkaasoo aad weligaaba nebcayd. Iminkana, waxa laguugu yeedhay inaad hor timaaddo Xaawa kadib markii aad tiigsan weyday/raaci weyday hadafyadii laguu dhigay bil ka hor, markii aad la garatay tirada alaabta iyo arrintii kale ayaad niyad u heli weyday wixii kale. Sidaad adba xasuusato, waxaad ku heshiiseen arrimahan:

- Inaad u dhaqaaqdo tirada dhammaan alaabta taalla bakhaarka;
- Inaad liis ka samayso alaabta aan iminka wax faa'iido ah lahayn ama taariikhdeedu dhacday;
- Inaad ka taagto / binayso gidaar kala qaybiya qolka istoodhka ah iyo mafrishka alaabta ay shaqaalaha kale ka qaataan.

Inkastoo aad isku daydady inaad ku dhaqaaqdo tirinta alaabta ka dib markii aad ugu dambayn-tii heshay hab, waxa markasta kaa soo dhexgelayey dad rabay inaad alaab ka siiso istoodhka. Gidaarkiina, alaabtii aad ku dhisi lahayd ayaad soo weyday, hayeeshee, iskumaad hawlin inaad la socodsiiso denigii aad u shaqaynaysay (your boss). Waxa intaas dheer, waxay kula noqotay inaanay arrintaasi daruuri ahayn, tahayna tusaale labaad oo hawlaha aan wax faa'iida ah lahayn ee ay haddana dalbato maamuluhu.

**Jilidda doorka 2**

Aamina oo ah xoog-ku deeqdada ugu muddada dheer xagga shaqada waa qof maskax weyn, aad u firfircoon niyadna u haysa inay qabato hawlo aanay cid kale diyaar u ahayn inay gutaan. Weligaaba waxaad la socotay inay ku liidato xarfado dublumasinimo ah (tact). Laakiin maxaa diirdiiranaan iyo hawl ku dhaqaaqid ah! Waagii hore, farxadeeda aan kantoroolidda (unbridled) lahayni wax mushkilado waaweyn ah lagalama kulmi jirin. Waxaad u diri jirtey hawlgallo inta badan ay ku keliyeysan jirtey. Laakiin lix billod ka hor waxaad u xilsaartay Aamina, iyaduna ay ku adkaysatay barnaamij khuseeya ubadka suuq joogyada ah. Carruurtu waxay jeceshahay Aamina, ha yeeshee dhammaan mutadawiciinta kale ee mashruuca joogta oo lagu daro ku-xigeenkaaga qiimaha leh waxay diyaar u yihiin inay ka tagaan/ka baxaan mashruuca. Waxay kaga dhegtay inay Aamina tahay istusad (pushy), wax la hubana ay tahay inaanay koox wax la qabsan karin. Waxay qabaan inay isku daydo in iyada maahee qof kasta oo kooxda ka tirsan ay carruurtu u aragto qof xun iyo shaqaalaha kaleba. Sida ay kugu yidhaahdeen, “Waxaanu khatayaan ka joognaa/waxaanaan u dulqaadan karin dabcigeeda adag”.

Markii Aamini ay mashruuca ku soo biirtay, adiga iyo iyadu/labadiinu waxaad heshiis ku gaadheen hadafyo ay tiigsan doonto Aamini lixda bilood ee u horreeya mashruuca. Kuwaas waxa ku jira:

- Deeq-ururin gaadhaysa $2,000 oo lagu maalgelinayo bandhig hore loogu dhigayo xirfad gacmeedda carruurta,
- Shaqa qoridda toddoba haween ah oo xirfadlayaal sare ah oo la taliya tababarana (mentor) hablo dhallin yar oo ay dhibaato ka haysato sharciga, iyo,
- Lala shaqeeyo Golaha Magaalada si isbeddello loogu sameeyo xeerka u diidaya carruurta dhowr-iyo-toban jirrada ah inay shaqa qabtaan, arrintaasoo dhibaato halis ah u keentay hablaha yaryar ee agoomaha ah ee mas’uulka ka ah quudinta ubadka yaryar ee walaalahay yihiin (siblings).

Hadafyadaas oo dhan Aamina hore ayey u dhaaftay filitaanadii. Waxay so ururisay deeq gaadhaysa $4,300, waxay shaqa qortay (10) tababarayaal dumar ah oo xirfado sare leh, waxaanay ku guulaysatay inay wax ka beddesho xeer hoosaadkii loogu talgalay hablaha yaryar ee shaqeeya.

**Jilid door 2**
**Doorka Mutadawaca**

Waxaad xoogaaga ugu deeqday NGO dalka gudihiisa ah sanooyin badan, waxaanay kuu noqotay khibrad wacan. Waqtiyadaas inta badan, waxaad ku hawlanayd mashaariicda, kuwaasoo badanaaba aad kelidaa qabanaysay. Dabadeedna, mashruucii carruurta ayaa lasoo maalgeliyey iyadoo loo soo marayo NGO-ga. Waxay u ekaatay wax aad u xiisa leh, waxaad u sheegtay Yuusuf oo agaasimaha fulinta ah, inaad doonayso inaad ka shaqayso mashruuca. Waxaad xasuusataa weli isagoo su’aal kaa weydiinaya waqtigaas inaad ku shaqayn karto xubin koox ka tirsan. Waxaanu hadalka u dhigay sidan, “Waxaan maqlay xoog ku- deeqayaasha qaar oo isku leh inay adag tahay si ay cidi kuula shaqayso”. Waxaad u ballanqaadday inaanay wax dhibaatooyin ah dhinacaaga ka imanayn.

Mar allaale markii mashruucu uu dhaqaaqay, xiisa aad ah ayaa ku sii galay la xidhiidha harumarka aad ka gaadhay hadafyada shakhsi ee adiga iyo Yuusuf aad wada dejisateen inaad ku socoto bilaha yaree u horreeya mashruuca. Ha yeeshee, waxa niyad jab kugu riday nidarka ay mutadawiciinta kale u galeen mashruuca. Waxay iska fadhiistaan meel bunna way cabbaan waxaanay ku anda-

coodaan inay ciyaalkii dhibaatooyin la kulmeen. Waxay kugu qasbayaan inaad u sheegto inay ismashquuliyaan mar wax ka badan markay kuula muuqato in xilliyada shaqada loo qabtay qaarkood aan laga gaadhsiin karin. Maalmaha dambe waxaad aragtay inay carruurtii qaarkood kugu soo jehaynayaan/dirayaan si ay kaaga horyimaaddaan.

Markii aad ku soo biirtay mashruuca, adiga iyo Yuusuf waxaad ku heshiiseen hadafyada qaar aad leedahay inaad tiigsato lixda bilood ee u horreeya mashruuca, kuwaas waxa ka mid ahaa:

- Deeq-ururin gaadhaysa $2,000 oo maalgelin u noqota bandhig hore loogu marinayo hawlgacmeedka ay carruurtu samayso,
- Shaqa qorista toddoba haween ah oo xirfado sare leh oo tababarayaal u noqda hablaha yaryar ee shuruucda ay dhibaato ka haysato, iyo,
- Kala talin (consulting) Golaha Magaalada inuu wax ka beddelo xeerka u diiddan/hortaagan dhowr iyo toban jirradu inay shaqa galaan. Xeerkii hore wuxu ahaa mid mushkilad ku noqday hablaha yaryar ee agoomaha ah ee mas'uulka ka ah quudiyana ubadka yaryar ee ay walaalaha yihiin.

Dhammaan hadafyadaas, waxaad ka gudubtay filitaanadii Yuusuf, waxaad soo ururisay deeq qaddarkeedu uu yahay $4,300, waxaanad shaqa qortay 10 dumar ah oo xirfado sare wata tababarayaalna ah, kuwaasoo ku guulaystay inay wax ka beddelaan xeerka dawladda hoose ee loo qoondeeyey hablaha yaryar ee shaqeeya.

## XAASHIDA SHAQADA GOOBJOOGAHA EE TUULKA 13: MAARAYNTA WAXQABADKA AAN LAGA RAALLI AHAYN

Intaanay bilaabmin jilidda doorku dib u eeg su'aalaha soo socda. Waxay kaa taageerayaan si aad ula socoto waxa dhexmara labada shakhsi ee dhibaatadu ay ka haysato waxqabadka. Ha ka maagin inaad qoraallo samayso marka la sii guda galo jilidda doorka. Waxay kaa caawinaysaa inaad xasuusato qaar ka mid ah wadahadalada kuwa xiisaha iyo go'aanka leh.

1. Danta uu ka leeyahay wadaxaajoodka ma caddeeyey maamuluhu marka hore?
2. Dhibaatada ma lagu sharxay erayo cayiman?
3. Ma dajiyeen wax shuruuc hoosaad ah oo ku saabsan sida ay uga wadahadlayaan mawaadiicda soo dedejiyey shirka?
4. Maamuluhu ma weydiiyey su'aalo arrimaha ku qotoma?
5. Maamuluhu ma dhegaystay wixii qofka shaqaalaha ahi uu damacsanaa inuu sheego?
6. Qofkii shaqaalaha ahaa amase xoog-ku deeqihii fursad ma u helay inuu sharxo dhibaatada?
7. qofkii shaqaalaha ahaa amase mutadawiciinta hadalka ma sugay/ma dhegaystay?.
8. Mushkiladaha heshiis ma lagu ahaa?
9. Midkoodna ama labaduba xal ma la soo boodeen intaanay isku deyin inay dhibaatada si weyn u fahmaan?
10. Miyey gaadheen wax xal ah oo ay labadooduba ku soconayaan?
11. Ma jirey is afgarad cad iyo heshiis khuseeya tallaabooyinka waxqabad ee labada dhinacba ay qaadi doonaan?
12. Waqti ma u qabteen dib u dhugashada harumar?
13. Maxaa faallooyin kale aad is leedahay waxay waxtari karaan in lala wadaago labada ka qayb gale niibtan waxqabad?

# TUULKA 14

## DIYAARINTA QORSHE WAXQABAD

Haddii aqoon-isweydaarsigaaga ku saabsan maamulidda kartida aadmiga muddadiisu ay tahay maalin ama laba, waxaanu soo-jeedinaynaa inaad ku soo afjartid waaya-aragnimada barasho layli kooban oo qorshayn waxqabad la xidhiidha. Waxa kale oo ay noqon kartaa qiimayn aan rasmi ahayn oo ku lug leh aqoon-isweydaarsiga. Waxaanu rumaysanahay xasuusahan gebegebada ah ee ku lug leh “Maxaan koroshsaday ee aan isticmaali karaa iyo sidee ayaan u qorsheeyaa inaan u isticmaalo markaan guriga/meeshayada aan ku noqdo” ayaa kordhin kara ahamiyadda saamaynta qaarkeed ay ku yeelan karaan waxqabadka io hababka wax loo qabanayo ee hay’adda. Haddii aad codsato naqil dheeraad ah oo qorshahooda waxqabad ah oo aad isticmaasho, taasoo aanu qabno inay fikrad wacan tahay, waxaad u diri kartaa ka qaybgalaha naqilkaas bil ama wax lajira gudaheed, xasuus ahaan. Waxa kale oo uu noqonayaa tuul suuqayn leh oo aad iyo aad u fiican.

TUULKA 14:
DIYAARINTA
QORSHE WAXQABAD

**Ulajeeddada barasho:** In la diyaariyo qorshe waxqabad oo lagu dhammaystiro casharro lagu qaatay aqoon-isweydaarsadkii.

**Waqtiga loo baahan yahay:** Qiyaastii 20 daqiiqo.

**Hawsha**

Waxa shaki la’aan ah inaad hayso nooc adiga kuu gaar ah oo qorshe waxqabad ah oo aad ku dhaqanto dhammaadka aqoon-isweydaarsiga. Iyadoo ay taasi jirto, halkan waxaan kuuugu muujinay mid kale.

Magaca: ____________________________________________

Taariikh: ____________________________________________

Markaan soo iftiin-celiya waaya-aragnimada aqoon-isweydaarsigan, waxa ugu muhiimsan ee aan soo bartay waxa weeye:

____________________________________________
____________________________________________
____________________________________________

- **Si kastaba ha ahaatee, waxaan rabaa inaan wax ka sii korodhsado:**

- **Anigoo sal uga dhigaya waaya-aragnimada barashadan, waxaan qof ahaan qorshay-stay inaan u beddelo habka aan u qabto arrimaha soo socda siday ugu lug leeyihiin maamulidda iyo harumarinta kartida aadmiga. Cayin intii suurtagal ah wixii aad ku dhaqaaqi doonto, sidaad iyo halkaad ku qaban doonto, iyo intay waqti qaadan doonto iyo weliba arrimaha kale ee aad isleedahay waa loo baahan doonaa si loo fuliyo isbed-del kasta.**

- **Anigoo ku salaynaya waxyaalihii aan ka soo bartay aqoon-isweydaarsigan, waxaan samayn doonaa wax ka beddeladan soo socda ee qaababka iyo nidaamyada HKA ama waxaan kula talin doonaa dadka wax ka beddelka samayn kara si aan u kordhiyo firfircoonida guud ee hay’addayada.**

# TUULKA 15

## QORITAANKA BUUGGA WARSIINTA SHAQAALAHA

Tuulkan waxa laga helayaa tilmaan kooban oo khusaysa buugga warsiinta shaqaalaha. Ulajeeddada hore ee laga leeyahay waxay tahay inuu ka caawiyo hagidda dadka qorshaynaya inay u qoraan buuggan oo kale hay'addooda. Arrintani kama reebayso isticmaalkiisa layli tababar ahaan. Dadka raba inay u isticmaalaan diyaarin tababar, waxaanu leenahay qoraalka soo socda adigaa laguugu talagalay. Haddii ay ujeeddaadu tahay inaad u isticmaasho aalad naqilaadeed oo ku lug leh qoridda buugga warsiinta shaqaalaha, fadlan bogga kan xiga u gudub.

**Ujeeddada barasho:** In la siyaadiyo aqoonta iyo tabaha ka qayb galaha ee ku lug leh qoridda buugga warsinta shaqaalaha ee hay'adaha aan dawladda ahayn ama kuwa salka ku haya bulshada.

TALOBIXIN SOCDAAL

**Ka qayb galayaasha:** Waxaad ka qayb galayaashaada ku koobtaa kuwa doonaya inay qoraan buugga warsiinta shaqaalaha oo qudha ama inay dib ugu noqdaan naqilka hadda jira. Markaad haysato tafaasiisha nooca waaya-aragnimada barashadan, waxaad ku koobtaa tirada ka qayb galayaasha toban ilaa laba iyo toban.

**Waqtiga loo baahanyahay:** Waxaad u qorshaysaa maalin dhan.

### Hawsha

**Hawlgalka aqoon-isweydaarsiga ka hor:** Waxaad ka dalbataa ka qaybgale kastaa inuu la yimaaddo aqoon-isweydaarsiga dhammaan siyaasadaha maamulidda kartida aadmiga (MKA), nidaamyada, dookumantooyinka (Handouts), iyo foomamka hore loo isticmaalay hay'addooda. Faritaanadaada aqoon-isweydaarsadka ka hor, waxaad tustaa inay ku dhaqmi doonaan alaabtan ku dhaqaaqidda tilmaan faahfaahsan oo la xidhiidha buugga warsiinta shaqaalaha ee hay'addooda.

**Naqshad-dejinta aqoon-isweydaarsiga ee lagu tala bixiyey:**

1. Faritaanada, hawlaha guri-hagaajinta/sallixidda, iyo ujeeddooyinka aqoon-isweydaarsiga, inkastoo aanay sidan isu xig-xigin, waxaad kooxda u dirtaa maskaxda inay ku daaliyaan wax allaale waxa ay u malaynayaan in lagu dhigi karo buugga wargelinta shaqaalaha. Waxaad weydiisataa ka qaybgalayaashu inay u dhigaan fikradaha qodobo urursan ama jaadad caqligal ah marka laga eego geesta qoraalka buugga wargelinta shaqaalaha. Kadib markaad meelba qaar ku ururiso, u habee ururadii mowaadiic aad kala hormariso amase cinwaano/madaxyo jisas.

2. Waxaad soo hordhigtaa wadahadal kooban oo hagan kuna saabsan sababta ay muhiim u tahay qoridda buugga warsiinta shaqaaluhu, waxyaabaha uu ka koobnaan karo iyo arrimaha uu fulin karo geesta MKA. Waxaad ku sajishaa qodobada waaweyn sabbuurad cad ama

boodhka waraaqaha ballaadhan wata (flip chart), waxaanad u isticmaashaa dib u dhugashada liiskii aad kusoo aragtay Hawsha 1. Waxaad kala garataa liiskii ka unkamay fadhigii madax daaliska lahaa ee u dhigma shuruudaha lagu bandhigay wadahadalkan.

3. Waxaad kooxda u kala jebisaa kooxo-hawleed yaryar, adigoo ku salaynaya tirada cinwaanada jisaska ee ka qayb galayaashu go'aansadeen inay muhiim yihiin ee ku jirey Hawsha 1. Waxaad siisaa waqti ah 30 daqiiqo oo ay ku hirgeliyaan waraaqihii joornaalka tilmaan kooban oo khusaysa warka ay rumaysan yihiin inuu muhiim u yahay in lagu daro jiska loo xilsaaray inay wax ka qoraan. Waxaad siisaa ka qaybgale walba naqilka dookumantiga ku xiga/soo raaca faritaanadan aqoon-isweydaarsiga, "Hagitaano Loogu Talagalay Qoritaanka Buugga Warsiinta Shaqaalaha".

4. Dib isugu yeedh koox shaqo kastana waxaad ka dalbataa inay ka warbixiso tilmaantooda kooban ee isu xig-xigta jisaska loo xilsaaray. Waxaad ka ogolaataa kala qeexidda su'aalaha bandhigid kasta dabadeed oo qudha. Marka dhammaan warbixinada kooxaha la bandhigo, waxaad dib u dhugataa liistooyinka, adigoo ka hubinaya arrimo isburinaya, wax ka saaraya, wax laga tegay ku kordhinaya, iyo is xig-xigsiinta. Hawsha yar ee ugu dambaysa tallaabadan waxa weeye inaad ku raacdo tilmaanta dhan ee buugga wargelinta shaqaalaha ee ku salaysan waaya-aragnimadooda wadajirka ah iyo baahiyahooda.

5. Hawlahan waa inaanay kugu dhaafin duhurka. Intaanad qadada u nasin, waxaad dib u eegtaa wixii harumar ah ee la sameeyey aroornimadii, waxaanad xasuusisaa hawlaha la gelidoono galabnimada.

6. Qadada dabadeed, ka qaybgalayaasha waxaad u kala saartaa kooxo laba-laba qof ah. Waxa looga danleeyahay kooxahaas laba-labada ah in qof kastaa uu helo qof uu la shawro amase uu u hasyto dib u quudinta iyo taageerada. Waxay go'aansan karaan labada qof mid waliba inuu gaarkiisa u shaqeeyo waqtiga inta badan ama ay wadajir u shaqeeyaan. Go'aamadaas iyaga ayey jirtaa inay gaadhaan. Hawlgalkooda qof ahaaneed fadhiga galabta waa inay tilmaan buuxda ka bixiyaan waxa uu ka koobnaan doono buugga warsiinta shaqaalaha ee hay'addooda. Hadafku waxa weeye in la helo tilmaan dhammaystiran oo buugga warsiinta shaqaalaha ah oo ay u qaataan guryahooda, waxaad siisaa waqti lagu qiyaaso 30-45 daqiiqo oo xidhitaanka aqoon isweydaarsadka ka horreeya oo ay ku soo bandhigaan tilmaamahooda.

   Ma xasuusataa hawshii aqoon-isweydaarsiga ka hor markii aad ka dalbatay ka qaybgale kastaa inuu la yimaaddo aqoon-isweydaarsiga wixii murti qoraal ah ee uu ka soo diyaarin karo barnaamijka MKA ee hadda jira? Haddaba, xilliganu waa goortii ka qaybgale kastaaba uu wakhti yar ku qaadan jirey habaynta murtidan, isagoo sal uga dhigaya tilmaanta kooban ee buugga ee lasoo saaray qadadii ka hor. Waxaad ku dhiirigelisaa ka qaybgale walba inuu isu keeno/isla soo doonto (incorporate) siyaasadaha amase nidaamyada MKA horeba loogu dhaqmi jirey haya'dda ee ay rumaysan yihiin inay wacan yihiin. Waana inay qoraallo ka sameeyaan harumarinta ama isbeddelada lagu sameeyo siyaasadaha iyo nidaamyada ka liita, intaanay ku soo darin buugga wergelinta shaqaalaha oo aan lagu shaqayn.

7. Waxaad ku xidhaa aqoon-isweydaasiga inaad ka dhegaysato ka qaybgale kasta wuxuu qorshaystay inuu ku dhaqaaqo marka uu ku laabto hay'addiisa si uu u dhammaystiro qoridda

buugga wargelinta. Waxaad hubisaa inay diyaar u yihiin inay wadaagaan soosaarista u dambaysa ee buugga wargelinta tixraac murtiyeed ahaan. Waxaad qabataa qiimayn aqoon-isweydaarsi dedgdeg ah, tusaale, waxaad ka codsataa ka qaybgale kasta inuu sheego wixii ugu faa'iidada badnaa iyo wixii ugu faa'iidada yaraa ee la xidiidha hawlgalladii maalintaas.

**HAGITAANO KHUSEEYA QORITAANKA BUUGGA WARSIINTA SHAQAALAHA 1**

Buugga warsiinta shaqaaluhu waa tuul is-gaadhsiineed oo laga helo warka ku saabsan baahida shaqaalaha inay ogaadaan waxay xaq-u leeyihiin iyo xilalka ay hayaan iyagoo xubno ka ah hay'addaada. Ma aha daruuri inuu buuggu noqdo mid qurux badan oo aad loo jeclaado (fancy) ee waa inuu ahaado mid faa'iida leh. Qof kasta oo shaqaale ah waa inuu hasyto naqil ilaa taariikhda lagu jiro ah (an up-to-date) si uu uga eegto markuu qabo su'aalo la mid ah:

- Maxay yihiin maalmaha shaqada laga fadhiyaa/ fasaxa la yahay?
- Goormaa mushaharka la bixiyaa?
- Caymiska caafimaadka ee aan haystaa/ku jiraa waa noocma?
- Maxay yihiin qawaaniinta badbaadadu?
- Sidee ayaa qof iila soo xidhiidhi karaa markay xaalad degdeg ahi timaaddo?
- Qofkee ayaan kala xaajoon karaa markaan su'aalo ka qabo danahan?

TUULKA 15:
QORITAANKA
BUUGGA
WARSIINTA

Haddii aad la shaqayso shaqaalaha lacagta la siiyo, ama ha ahaadaan kuwa joogtada ah ama saacado yar qaar shaqeeya iyo mutadawiciin, waxa laga yaabaa inaad doonto inaad u diyaariso buugag wargelin labada noocba ah. Haddii fikraddani ay u muuqato mid hawl badan adigoo haysta wax allaale wixii kale ee hay'addaadu ay u baahan tahay ama arrin si la hubo u leh mudnaan hoosaysa, mar kale ka fakir. Halkan waxa kuugu yaalla sababo dhowr ah oo khuseeya waxay arrin wacan u tahay in la diyaariyo buugga wargelinta.

**Maxaa wacay in waqti qaali ah lagu qaato qoritaanka buugga warsiinta shaqaalaha?**

1. Waxay kugu noqonaysaa niib adag inaad qoraal ka wada dhigto dhamaan siyaasadahaas aan rasmiga ahayn iyo nidaamyada aad diyaarisay sannado gudahood ee u noqonaya salka heshiiskaaga bulsho ee shaqaalahaaga.

2. Qoraal ahaan kolka laga dhigo waxay akidaysaa in loo maareeyey ha badato ama ha yaraatee si loo simanyahay oo cadaaladi ay ku jirto.

3. Waxay kuu kaydinaysaa maamule ahaan wakhti aad ugu sharxi lahayd siyaasadahan iyo nidaamyadan qof allaale qofkii su'aalo ka qaba. Shaqaalahaaga iyo xoog-ku deeqayaasha ayaa garanaya halka ay ka helaan jawaabaha su'aalo door ah oo ay iminka ula yimaaddaan adiga iyo kormeere kale.

4. Waxay ka dhigaysaa wargelinta shaqaalaha wax fudud, cid kastaana war isku mid ah ayey

helaysaa. Sida laga yidhaahdo caalamka ciyaaraha, "qof kastaaba wuxu ka soo shaqaynayaa isla kaadhkii goolasha oo isku mid qudha ah".

5. Lahaanshaha siyaasado iyo nidaamyo qoran waxay qiimo ugu fadhidaan waqtiyada soo socda, haddii qof shaqaale ahi uu go'aansado/ay la noqoto inuu sharci ahaan ugu babacdhigo dhaqan shaqo amase siyaasad. Arrinku marka uu sidaas yahay, had iyo goor waa fikrad wacan inuu qofka shaqaalaha ah uu akhristo buugga faritaan ka, dabadeedna uu saxeexo foom odhanaya waan akhriyey buugga waanan fahmay waxa ku yaal.

6. Buugga shaqaaluhu wuxu yahay meel wacan oo aad kaga hadli/sheegi karto qiimayowga hay'adda oo erayadaada aad ku tilmaami karto nooca hay'adeed ee aad rabto inaad dhisto oo aad ku wada waartaan.

**Muxuu ka koobnaan karaa :**

Haddii aad iminka ku qanacsan tahay in diyaarinta buuggani ay tahay fikrad wacan, waa inaad fiiro u yeelato inaad arrimaha soo socda iyo warba ku darsato buugagga warsiinta shaqaalaha.

- **Kusoo dhawow hay'addayada!** Halkani waa meesha aad ku sidanayso shakhsiyadda hay'addaada, aad sheegayso sababta ay muhiim ugu tahay bulshada ee aad ku qaadayso qiimoyowga runta ah ee hay'addaada iyo dadkeeda aad ugu dedaalaya inay sharaf ku lahaadaan wadashaqayntooda. Qiyaastii NGO iyo CBO kasta dadkiisa ayaa laga fahmaa wuxu yahay. Taasina waa meel kale oo farriimahan looga soo saari karo dadka aad u cisiga leh, kuwaasoo ah shaqaalahaaga.

- **Habka aanu u maamulno kartida aadamahayaga.** Buuggan wargelinta ah wuxuu soo bandhigay/soo kalabixiyey gelitaan qaabaysan oo ku lug leh MKA. Haddii hay'addaadu ay ku hawlgasho faahfaahin-murtiyeedka fikradaha halkan lagu soo muujiyey ama siyaaba kale, halkani waa meeshii laga sheegi lahaa waxay yihiin siyaasadahan iyo nidaamyadan. Tusaale ahaan, waxaad ku soo dartaa siyaasadaha adeegsiga / kireysiga, tafaasiilaha shaqo, sida shaqooyinkan loo kala sooco ee ulajeeddooyinka u bedidda /magdhowga, iyo tafaasiilaha kale ee khuseeya sida qof shaqaale ah loogu soo biiriyo hay'adda ee loo maamulo. Waxay waxoogay u egtahay wax iswada sida mashiinada, ha yeeshee waxaad u baahan tahay haykal (dhisme) iyo qaabab lagu hubiyo sinnaan iyo fududayn / sahlid marka la maaraynayo shu'uunta shaqaalahaaga.

  Arrimaha soo socdaa waxa weeye fikrado dheeraad ah oo maskaxdaada dhaqaajinaya markaad qaybtan buugga warsiinta isu keento.

- Ma u baahantahay xilli/muddo isbarasho ah xagga shaqaalaynta, waqtiga midkiinba qofka kale uu qiyaasayo si uu arko inuu istaahil yahay ama u qalmo?

- Sidee ayaad dadka u ogeysiisaa shaqooyinka cusub? Ma siisaa shaqaalaha hadda jooga fursad ay ugu tartamaan intaanad ka raadin hay'adda meel ka baxsan?

- Waxaad iyaga ka warrantaa adeegsiga dadka ehelkoodu ay hore kooxdaada uga tirsanaayeen? Tani waa siyaasadaha qaar ka mida oo si weyn ugu xidhan/ugu tiirsan caadooyinka dalka iyo dhaqanka.

- Dib u dhugashooyinka waxqabad noocee ah ayaa qofka shaqaalaha ama xoog-ku deequhu uu filan karaa?

- Ma jiraan baahiyo sharci oo khuseeya dhinaca shaqaalaynta oo u baahan in laga fiirsado?

- **U bedidda iyo xuquuqda aan lacagta ahayn.** Arrinkani waa meesha lagaaga baahan yahay inaad ka jawaabto dhammaan su'aalaha ay qabaan shaqaalahaagu ee ku saaabsan saacadaha shaqo, maalmaha lagu mushahar siinayo, xuquuqda aan lacagta ahayn, markay qayb ka tahay qorsho dalka gudihiisa ah ama ay gaar u tahay hay'addaada, fasax sannadeedada, fasaxyada kale ee caalamiga ah, iwm. Waxa kale oo aad fiiro siisaa fasaxyada bukaanka iyo umusha, fududaynta xannaano maalineedka, haddii ay jiraan, xilliyada siyaasadaha ee noocyada kala duwan ah, diyaarinta saacadaha dheeraadka ah, u celinta lacagta noolka, fursadaha tababarka iyo harumarinta. Hadaba, shaki waxaanu ku jirin inaad sawir ka qaadatay waxa ka socda qaybtan.
- **Siyaasadaha iyo dhaqamada meesha shaqada.** Qaybtani waxay deyeysaa dhammaan dhinacyada naadirka ah ee dabciga qofka iyo kooxda hay'addaadu ay la kulantay sannado ina dhaafay ama laga yaabo in laga dhigay siyaasad maalintii albaabada loo furay hay'adda. Dadka qaar waxay yidhaahdaan arrimahaasi, qayb ahaan, waxay tilmaamaan hiddaha (dhaqanka) hay'addaada. Halkan waxa ah erayo tusmooyin ah oo aad ku garan karto waxyaalaha aad ku soo mari doonto qaybtan: ilaalinta saacadaha shaqada, huga, sigaar-cabidda, isticmaalka tilifoonka, iska horimaad daneed, xidhiidhka macaamiisha amase xidhiidhka saaxiibada shaqo, caga juglaynta/cadaadinta, badbaadada, sirta, dacwooyinka, iyo digniinada qoraalka ah oo kaaga yimaadda maamulka. Liisku sidaas ayuu u sii socon karaa, ha yeeshee, iska ilaali inaanad doonida ka dhicin. Waxaad ku dartaa qaybtan waxyaalaha muhiimka u ah hay'adda lagana filayo shaqaalahaaga oo keliya.

- **Nabadgelyeynta.** Haddii ay soo dhakhsato iyo haddii kaleba, waxaynu eegnaa waa inagoo nabadgelyeynta hay'adda ama hay'adda oo ina nabadgelyeysa. Qaybtan, waxaad ka hadashaa waxyaabaha kala doorashada leh, wacan ee aan sidaas u sii wacnayn, tusaale, shaqa ka saaridda badheedhka ah iyo ta aan loo kasin. Waxa kale oo aad maskaxda ka rog-rogtaa suurta-galnimada shaqaala-dhimidda, laba-daran mid-doorada dhammaadka heshiiska shaqo (the end of contract dilemma), xurmada (sharafta) ogeysiin bixinta ka horraysa shaqa-ka-bixidda ee ka timaadda labada dhinac ee xidhiidhka shaqo midkood, iwm. Inkastoo aanad jeclaysanayn inaad ka dhigto dhinacan heshiiska shaqo qoraal ahaan, haddana waxay kaa caawisaa muddadaas kala guurka ah inay wax kala fududayso haddii ay dhacdo.

- **Iyo, wax allaale wixii kale ee aad rabto inaad ku tidhaahdo shaqaalahaaga ee aad rabto inaad qoraal ahaan ku siiso.** Hay'ad waliba si gaar ah ayey tahay NGO iyo CBO-yo badanina goonidaas ayey ku quulaystaan (thrive). Arrinku marka uu sidaas noqdo, talooyinkaas kor lagu soo sheegay waxa laga yaabaa inaanay meesha leekayn, waxay u dhow yihiin inay qaar aad u murugsan ku noqdaan, ama ay ku noqdaan hay'addaada waxaan awooddeeda runta ah la fahmi karin (bureaucratic). Ammuurtaasi wax mushkilad ah anaga naguma hayso, waxaanad fikradahaas u qaadataa / ka dhigataa fikrado ku lug leh waxyaalaha la gelin karo buugaagga warsiinta shaqaalaha. Waxa taasna ka sii muhiimsan,

tuulkan maamul waxaad ka dhigtaa mid aad ku shaqaysato maamule ahaan, iyo weliba mid ay ku shaqaysato cid kasta oo hay'adda joogtaa. Hadda, waxaynu gelaynaa fikradihii u dambeeyey qaarkood oo ku saabsan habka aynu dookumentigan waraaq ugu dul qori lahayn.

**Fikrado la xidhiidha sida qoraal looga dhigayo.** Haddii aanad hayn buugga warsiinta shaqaalaha oo noocaas ah oo aad ka fakirayso inay wacnaan lahayd in la helo mid, oo aad iminka ku dhididday maskaxda ka rog-rogidda arrinkaas, waxaanu ku leenahay wadno yeelo. Waxaad fiiro u yeelataa ammuuraha hoos ku qoran si aydin adiga iyo kooxdaaduba ugu dhaqaaqdaan soo saariddooda.

- Waxaad isugu yeedhaa shir shaqaale waxaanad soo-jeedisaa suurtagalnimada diyaarinta buugga wargelinta shaqaalaha sida kii aynu ka wada hadlaynay. Haddii aad aragto inay niyad u hayaan, waxaad maskasdooda ku gudhisaa qodobada ay tahay in lagu daro. Waxaad u yeedhataa xoog-ku deeqayaal laga yaabo inay yeelaan qoritaanka qabyo-qoraalka u horreeya.

- Ha ka werwerin inaad ka dhigto wax dhan sababtoo ah waa qoraalkii u horreeyey. Waxaad ka dhigtaa / ka soo qaaddaa shaqo socota. Marba wax ku kordhi, hana illaabin inaad samayso dib u dhugashooyin marba sida ay baahidu tahay. Waxa iman doona xilliyo aad u baahan doonto inaad ka jarto/ka saarto qoraallada qaar ee aan muhiimka ahayn.

- Haddii aad ogaato dabeecadda isbeddel ee dookumantigan, waxaad ka fakirtaa inaad ku riddo jeldi ah nooca debecsan si si-sahlan loogu samayn karo isbeddelada.

- Waxaad rog-rogtaa samaynta naqillo aad u qaybiso shaqaalahaaga, taasoo aad ka dhigayso wax shakhsi ah. Ammuurtaasi waxay ku sahlanaanaysaa haddii waraaquhu ay yihiin kuwo debacsan (loose-leaf). Iyadoo wuxu ka kooban yahay buuggu laga simi doono dhammaan shaqaalaha, haddana waad shakhsiyeyn kartaa adigoo raacinaya tafaasiishooda shaqo, qiimaynta waxqabad, waraaqaha ammaanta ee khuseeya adeegga tusaale wacan (exemplary) u noqoshada hay'adda, soo-ururinta xuquuqda aan lacagta ahayn ee loogu talagalay sannadka cusub, iyo dookumantooyinka kale ee danaha shakhsi ku lug leh.

- Waxaad ku kordhisaa buugga warsiinta xaggiisa dambe naqilada foomamka ee shaqaaluhu ay u baahan karaan markay codsanayaan wakhtiga fasax sannadeedka, ay dalbadaan fasaxa lacag la'aanta, ay kula socodsiiyaan isbeddelka halka laga helo/cinwaanka, ama dhacdooyinka/arrimaha kale ee lagu fududayn karo iyadoo la helo dookumantigii rasmiga ahaa oo u diyaar ah shaqaalahoo dhan.

- Haddii hay'addaadu ay isticmaasho mutadawiciin, waxaad ka fakirtaa diyaarinta bug warsiineed oo u gaar ah, kaasoo lagu tilmaamayo siyaasadaha, barnaamijyada, iyo nidaamyada iyaga khuseeya. Waxay kuugu mahad niqi doonaan dedaaladaada, waxaanay kaydin doontaa waqti aad u badan iyo cadhagelinta shaqaalaha, gaar ahaan, haddii aad dareento dad tirabadan oo xoog-ku deeqayaashaada ka baxaya.

- Waxaad dejisaa qaab dib loogu eego buugga warsiinta taariikhda markaas lagu jirana marba la soo gaadhsiiyo. Buugagga wargelinta shaqaalaha, waxa had iyo jeer fikrad wacan ah in dib loo eego xilliga hawsha miisaaniyadda lagu jiro, maxaa yeelay, waa intaasoo qayb ka

mid ah buugga ay saamayn ku yeelato isbeddelada lagu sameeyo miisaaniyadda.

- Arrinkani wuxu dib kuugu celin doonaa boggii koowaad, kaasoo ah taladii in bogga hore ama meel ku dhow aad ku tilmaanto nooca uu noqon doono buugga wargelinta ee hadda la isticmaalo iyo taariikhda uu dhaqan galay.

TALOBIXIN SOCDAAL

**Talabixin socdaal! Hirgelinta qoritaanka buugga warsiinta shaqaalaha ee NGO amase CBO yar waxa la moodaa tacab-khasaar/amase hawl badan oo aan u dhigmin waxa laga helayo (overkill) oo aanay u dhoweyn wax lagu sheegi karo hawl muhiim ah oo u baahan in lagu qabto dedaaladaada si ay dhaqaale ahaan ugu sugnaato mid wacan oo laga gam'i karo. Ha ahaatee, waxaad aqoonsan tahay in buugga wargelinta ee noocaas ahi uu noqon kari lahaa mid waxtara oo weliba wakhti kuu kaydin kara lagana yaabo lacagna inuu kuu kaydin lahaa muddo kadib. Markaad haysato duruufahan suurtagalka ah, waxaad maskaxdaada ka qiyaastaa isdiritaanka fanka/naqshadaha loo yaqaan "Minimalism"-ka.**

1) Waxaad shir u qabataa shaqaalahaaga, ama ku kordhi hawshan lagu talabixiyey dhammaadka shir-caadi ah, waxaanad soo heshaa warka ay rabaan in lagu daro dookumanti noocaas ah.
2) Ha kuu sheegaan fikradahooda ku saabsan habka ugu fiican ee loo diyaarin karo dookumanti noocaas ah, mid iminka la isticmaali karona ka dhig.
3) Ha ogaadaan inaad u bogayso waxay ku soo darsadaan iyo inaad qorshaynayso inaad dookumantiga ka dhigto mid fudud/sahlan.
4) Waxaad weydiisaa inay jirto cid rabta inay ka qayb qaadato qoridda dookumantiga.
5) Iyagoo ku caawinaya, waxaad diyaarisaa naqil qabyo – qoraal ah, waxaadnad la timaaddaa shirka shaqaalaha ee kaas xiga si looga wadaxaajoodo, haddii xilli loo qabtay iyo haddii kaleba.

Fikrad kale oo ah intaan la kala dhaqaaqin. Waxaanu ku darnay qaybtan buugga faritaanka naqshad/hindise kooban oo khuseeya taageerada dadka kale inay bartaan habka loo qoro buugagga warsiinta shaqaalaha. Haddii ay kula tahay aqoon-isweydaarsi noocaas ahi inuu faa'iido u kordhin lahaa hay'addaada iyo NGO iyo CBO-yo kale oo bulshada ka mid ah, waxaad ka codsataa tababare dalka gudihiisa jooga amase hay'ad/machad tababar inuu qabanqaabiyo.

## GLOSSARY

| ENGLISH | SOMALI |
|---|---|
| 1. Accountability | **- Xisaabtan**<br>**- Xilkaa Saaran yahay** |
| 2. Action plan | **- Qorshe hawleed**<br>**- Wax-qabad hawleed** |
| 3. Active Listening | **- Dhegaysi feejigan**<br>**- Dhegaysi Darban**<br>**- Dhegaysi Mug leh** |
| 4. Alternative | **- Kala Doorasho**<br>**- Wax bedeli kara wax kale** |
| 5. Application | **- Arji**<br>**- Codsi**<br>**- Adeegsi** |
| 6. Assessment | **- Qiyaasid**<br>**- Qiimayn** |
| 7. Authority | **- Suldada**<br>**- Awood xukun** |
| 8. Awareness | **- Wacyi-galin**<br>**- Ka war qab** |
| 9. Basic Education | **- Wax-barasho Asaasi ah.** |
| 10. Beneficiary | **- Dan ku Qabe**<br>**- Ka faa'iidayste** |
| 11. Capacity Building | **- Kobcin wax Qabad**<br>**- Awood dhisid** |
| 12. Case Study | **- Daraasad Xaaladeed** |
| 13. Check list | **- Liis Hubineed** |
| 14. Civic | **- Madani**<br>**- La xiriira magaalo**<br>**- Muwaadin** |
| 15. Collaboration | **- Gacan siin**<br>**- Wada shaqayn**<br>**- Is Caawimid** |
| 16. Committee | **- Guddi** |
| 17. Communicator | **- Gaarsiiye**<br>**- Isgaadhsiiye** |
| 18. Community | **- Beel**<br>**- Jaaliyad** |
| 19. Community Development | **- Horumarin Beeleed**<br>**- Horumarin Jaaliyadeed** |
| 20. Concepts | **- Figrado**<br>**- Aragtiyo** |
| 21. Conceptual Hat Rack | **- Figrada Metalaada Xilaalka** |
| 22. Conflict | **- Is-qabad/Khilaaf**<br>**- Iska hor imaad** |

| | |
|---|---|
| 23. Consensus | **- Rayi la isku raacay<br>- Aqbalaad figrad guud** |
| 24. Consequently | **- Natiijo<br>- Cawaaqib** |
| 25. Constituency | **- Dagaan Doorasho** |
| 26. Co-operation | **- Iskaashi<br>- Wada shaqayn** |
| 27. Council | **- Gole** |
| 28. Councillor | **- Xil-dhibaan Degaan<br>- Xubin ka tirsan Gudiga degaanka** |
| 29. Counter productive | **- Maax Dumin<br>- Lid ku ah** |
| 30. Criteria | **- Cabirka wax lagu saleeyo<br>- Qoddobbo wax lagu saleeyo** |
| 31. Critique | **- Wax lagu Saleeyo** |
| 32. Decision Maker | **- Goa'aamiye** |
| 33. Definition | **- Qeexid** |
| 34. Delegation/Delegate | **- Wefti<br>- Ergo** |
| 35. Democracy | **- Demoqraadiyad** |
| 36. Description | **- Tilmaan<br>- Sifo<br>- Sharax** |
| 37. Dialogue | **- Wada Hadal** |
| 38. Effective | **- Wax ku ool<br>- Sidii la rabay wax u tarid** |
| 39. Effective leadership | **- Hogaaminta wax ku oolka ah** |
| 40. Efficiency | **- Wax qabad fiican leh** |
| 41. Elected Leadership | **- Hogaaminta la doortay** |
| 42. Empower/Empowerment | **- Awood siin<br>- Awood u fasaxid** |
| 43. Enabler/Enable | **- Awood siin<br>- Karti siin** |
| 44. Essay | **- Qormo<br>- Maqaal** |
| 45. Ethical | **- Hab-dhaqan** |
| 46. Evaluation/Evaluate | **- Qiimayn** |
| 47. Evaluation Survey | **- Qiimayn Sahan<br>- Baaritaan qiimayneed** |
| 48. Exercise | **- Layli** |
| 49. Facilitator | **- Fududeeye/Sahle** |
| 50. Feed back | **- War Celin<br>- Jawaab Celin** |
| 51. Financier | **- Masuul Maaliyadeed.** |
| 52. Gender | **- Jandar** |

| | |
|---|---|
| 53. Goal | **- Hadaf**<br>**- Gool** |
| 54. Good Governance | **- Hab Xukun Wanaagsan**<br>**- Hab Maamul** |
| 55. Government | **- Xukuumad** |
| 56. Group Discussion | **- Dood kooxeed** |
| 57. Guide | **- Tilmaamid**<br>**- Hage** |
| 58. Hand Book | **- Tilmaan Bixiye**<br>**- Tilmaame Bare** |
| 59. Human Resources | **- Khayraadka Dadka** |
| 60. Human Settlement | **- Degsiimooyinka Aadanaha**<br>**- Degaamayn** |
| 61. Implementation | **- Hirgalin**<br>**- Fulin** |
| 62. Information | **- Xog**<br>**- Wargelin** |
| 63. Institution | **- Haya'ad** |
| 64. Institution Builder | **- Haya'ad Dhise** |
| 65. Institutionalise | **- Haya'deeye** |
| 66. Instruction | **- Amar**<br>**- Wax barasho**<br>**- Wax barid** |
| 67. Key Point | **- Qoddobbo Muhiim ah.**<br>**- Qoddobbo Ma Dhaafaan ah** |
| 68.Leadership Process | **- Geedi socod Hoggaamineed** |
| 69. Learning | **- Barasho**<br>**- Wax Barasho**<br>**- Tacliin Barasho** |
| 70. Learning Objective | **- Ujeeddooyinka Barashada**<br>**- Yoolka Barashada** |
| 71. Local Government/Authority | **- Dawladda Hoose** |
| 72. Majority | **- Aqlabiyad**<br>**- Inta Badan** |
| 73. Management Process | **- Geedi Socodka Maaraynta** |
| 74. Meeting | **- Kulan**<br>**- Shir** |
| 75. Minority | **- Inta Yar**<br>**- Laga tiro yar yahay** |
| 76. Minutes | **- Hadal Qor**<br>**- Hadal qoraal** |
| 77. Mission | **- Ergo**<br>**- Risaalo** |
| 78. Monitoring | **- La socod**<br>**- La saan qaad** |

| | |
|---|---|
| 79. Negotiation/Negotiator | **- Wada Xaajood siiye<br>- Wada Hadal siiye<br>- Gorgoriye** |
| 80. Networking | **- Shabakadeyn/Nidaam hawleed oo wada shaqaynaya** |
| 81. Organization | **- Urur** |
| 82. Overseer | **- Korjooge** |
| 83. Overview | **- Dulmar/Guud Mar** |
| 84. Participants | **- Ka-qayb-galayaasha/Kaqayb-qaatayaa-sha** |
| 85. Perception | **- Faham/Dhugmo/Garasho** |
| 86. Performance | **- Waxqabad/Fulin Hawleed** |
| 87. Perspective | **- Ka eegid wajio kala duwan** |
| 88. Policy | **- Qorshe Hawleed/Khidad/Siyaasad** |
| 89. Policy Maker | **- Siyaasad Dejiye** |
| 90. Power Broker | **- Awood wax ku qabte/Awood adeegsade** |
| 91. Presentation | **- Soo Bandhigid/Qadimaad** |
| 92. Proactive | **- Ka hor dhaaf/Qorshe Curiye/Qorshe raac** |
| 93. Process | **- Geedi socod/Socodka** |
| 94. Questionnaire | **- Weydiimo Qoran/weydiimo taxane ah/ weydiimo<br>Sahan ah** |
| 95. Quorum | **- Tirada ugu yar ee shirku ku ansixi karo** |
| 96. Rational | **- Maan-gal/Macquul** |
| 97. Reactive | **- Falcelin/Qorshe laawe/Arrin ku baraa-rug** |
| 98. Reference | **- Tixraac/Raad raac** |
| 99. Reflection | **- Ilays noqod/Humaag noqod** |
| 100. Resources | **- Khayraad** |
| 101. Revenue | **- Dakhli** |
| 102. Role play | **- Door-jelid/Door ciyaarid** |
| 103. Session | **- Fadhi/Kulan** |
| 104. Shared Vision | **- Aragti wadaag** |
| 105. Simple Majority | **- Aqlabiyad hal dheeri ah** |
| 106. Simulation | **- Iska yeelid/U ekeysiin** |
| 107. Slums | **- Buul caws/Carshaan/Isku raran** |
| 108. Solution | **- Furdaamin/Xal** |
| 109. Stakeholders | **- Daneeyayaal** |
| 110. Strategic Plan | **- Qorshe istaratijiyadeed** |
| 111. Strategy | **- Istaratijiyad/Tab/xeelad** |
| 112. Summary | **- Soo koobid/Khulaaso** |
| 113. Symptoms | **- Astaamo/ Calaamado** |
| 114. Systematic | **- Habaysan/Nidaamsan** |

| | |
|---|---|
| 115. Technique | **- Farsamo/Xeelad** |
| 116. Training Design | **- JaanjooyadaTababarka/Naqshadeynta Tababarka** |
| 117. Training Material | **- Agabka Tababarka/Qalabka Tababarka** |
| 118. Training Need Assessment | **- Qiyaasid baahida Tababarka/Qiimeynta Baahida Tababarka** |
| 119. Transparency | **- Wax qaris laa'aan** |
| 120. Transparent | **- Qof aan waxba qarinaynin.** |
| 121. Unanimous | **- Loo dhan yahay/Gedigood** |
| 122. Vision | **- Aragti fog/Aragti dheer** |
| 123. Warm up exercise | **- Iskulalayn/Qandhicin/Diiran** |
| 124. Workshop | **- Aqoon Isweydaarsi** |
| **Priority two words** | |
| 125. Acknowledgment | **- Garwaaqsi/Garawsi/Mahad-celin** |
| 126. Administrative Fixes | **- Adeegsi** |
| 127. Analysis | **- Gorfeyn/Falanqeyn/Taxliil** |
| 128. Assignment | **- Shaqo Mucayin ah** |
| 129. Assumption | **- Maleyn/Si u qaadasho** |
| 130. Benchmark | **- Bar qiyaaseed/Bartilmameed** |
| 131. Challenges | **- Caqabad/Loolan/Hardan** |
| 132. Collective | **- Kooxeed/Urureed/Wadareed** |
| 133. Conceptual frame work | **- Gadaan-fikradeed/Aasaas fik** |
| 134. Constructive | **- Wax dhisid/Dhismo-gal** |
| 135. Conventional Wisdom | **- Xikmad soo jireen ah** |
| 136. Corruption | **- Musuq-maasuq/Laaluush.** |
| 137. Dilemma | **- Laba daran mid dooro** |
| 138. Diversity | **- Kala duwanaan/Kala gedisnaan** |
| 139. Encouraging | **- Dhiiri-galin/Geesinimo galin** |
| 140. Fundamental | **- Asal/Aasaasi** |
| 141. Identification | **- Tilmaamid/Baadi sooc/Aqoonsi** |
| 142. Individual Contribution. | **- Gacan ka geysi qofnimo/In qof biiri** |
| 143. Infrastructure | **- Dhismo-hooseed.** |
| 144. Input | **- Wax galin** |
| 145. Insight. | **- Aragti Maskaxeed** |
| 146. Inspiration | **- Maan-godlin/Ra'yi fiican helid** |
| 147. Interaction | **- Isdhex-gal/isla fal-gal/Isku dhafmid** |
| 148. Judgement | **- Xukun/Go'aan** |
| 149. Land Use Malaise | **- Aafada dhul boobka/Dhul ku habsa** |
| 150. Multipurpose | **- Ujeeddo badan/Ujeedooyin kala du** |
| 151. Output | **- Wax ka soo saarid** |
| 152. Potential Candidate | **- Musharax dihin/Musharax iman kara** |
| 153. Pre-training | **- Tababar horaad/Tababar hortiis** |
| 154. Priority | **- Mudnaan** |

| | |
|---|---|
| 155. Problem Solver | **- Furdaamiye/Xaliye dhib** |
| 156. Proficiency | **- Xirfad Hanasho/Aqoon sare u leh** |
| 157. Public | **- Guud** |
| 158. Public Sector | **- Qaybta Guud** |
| 159. Public Service | **- Adeeg guud.** |
| 160. Regulation | **- Xeer Hoosaad.** |
| 161. Self Governance | **- Isxukumid.** |
| 162. Self Introduction | **- Is-sheegid/Is-tilmaamid** |
| 163. Self study | **- Isbarid** |
| 164. Self Assessment | **- Isqiyaasid/Isqiimeyn** |
| 165. Shrinking Resources | **- Khayraadka sii yaranaya** |
| 166. Technical | **- Farsamo/Farsamayn** |
| 167. Training needs | **- Baahi tababar** |
| **Priority three Words** | |
| 168. Absolute Poverty | **- Saboolnimo** |
| 169. Absolute | **- Gebi-ahaan/Buuxda** |
| 170. Application Commitments | **- Nidar-gal/Daba-qaad ballan** |
| 171. Bureaucracies | **- Biroqraadiyad/Xafiisyad Dawladda oo shaqadoodu gaabis tahay** |
| 172. Caution | **- Taxadar/Digniin** |
| 173. Density | **- Cufnaan/Jirmiga shega** |
| 174. Environmental Degradation | **- Hoos u dhac degaan/Hoos u dhac xaalad-da degaanka** |
| 175. Equilibrium | **- Dheeli-tir/Is-le'eg** |
| 176. Hawker | **- Ha is wareerin/Dadka badeecada naadi-ya** |
| 177. Implication | **- Maldahnaan/Hadal aan dhab loo muujin laakiin laga fahmi karo wajiga qofka** |
| 178. Jurisdiction. | **- Haya'addaha Garsoorka** |
| 179. Legal Requirement | **- Baahida Sharciyeed** |
| 180. Legislation | **- Xeer Degin** |
| 181. Legitimate | **- Sharci ahaan/Qaanuun ahaan** |
| 182. Matchmaker | **- Isku aadiye wax isku habboon** |
| 183. Misinterpretation | **- Fasiraad xumo/Fasiraad qaldan** |
| 184. Off-spring | **- Farac** |
| 185. Optimistic | **- Samo-filasho/Samo arag/Dhanka Wa-naagsan ka eeg** |
| 186. Partnership | **- Wadaag/Wada lahaansho** |
| 187. Pessimistic | **- Xumo arag/Xuma filasho/Dhanka xun ka eeg** |
| 188. Phenomena | **- Ifafaalayaal** |
| 189. Professional | **- Xirfadle/Xeel-dheeri** |
| 190. Recycle | **- Sameyn celin/Dib u nacfi galin** |

| | |
|---|---|
| 191. Rules | **- Qawaaniin/Xeer** |
| 192. Status Quo | **- Xaalad taagan** |
| 193. Stimulation | **- Xiiso galin/Fi-fircooni galin** |
| 194. To Wear Different Hats | **- Xilqaad badnaan/Kaalimokala duwan qaa** |
| 195. Water Pollution | **- Dikhaw Biyood/Wasakhaw Biyood/Dhiiq** |
| 196. Facilitator | **- Fududeeye** |
| 197. Financier | **- Masuul Maaliyadeed** |
| 198. Gender | **- Jandar** |
| 199. Negotiator | **- Wada hadal siiye** |
| 200. Overseer | **- Korjooge** |
| 201. Policy Maker | **- Siyaasad dejiye** |
| 202. Power Broker | **- Awood wax ku Qabte** |
| 203. Institution Builder | **- Haya'ad dhise** |
| 204. Leader | **- Hogaamiye** |
| 205. Leadership | **- Hogaamin** |

**UN-HABITAT**
**TRAINING AND CAPACITY BUILDING BRANCH (TCBB)**
**AND REGIONAL OFFICE FOR AFRICA AND THE ARAB STATES (ROAAS)**
P.O.Box 30030 GPO Nairobi 00100, Kenya
Telephone: 254-20-623120; Fax: 254-20-624266/7
E-mail: infohabitat@unhabitat.org; Website: http://www.unhabitat.org
**EUROPEAN COMMISSION**